# OGEYSIISKA ILAALADA HABRAACYADA

**(2016)**

## LOOGU TALAGALAY ARDAYDA NAAFADA AH IYO WAALADIINTOODA

## SIDA WAAFAQSAN XEERKA SHAQSIYAADKA NAAFAFADA AH

# OGEYSIISKA ILAALADA HABRAACYADA

Waalidka Qaaliga ah,

Dokumentigaan wuxuu ku siinayaa ogaysiiska loo baahanyahay ee ku aadan ilaalada habraacyada ee lagu heli karo sida waafaqsan IDEA (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah) iyo qawaaniinta Waaxda Waxbarashada Mareykanka. IDEA, sharciga Federaalka ee khuseeya waxbarashada ardayda naafada ah, ayaa dugsiga uga baahan inay siiyaan waalidka (waaladiinta) canuga naafada ah ogeysiis wato sharaxaad buuxda oo ku saabsan ilaalada habraacyada la heli karo. Koobi ogeysiiskaan ah waa in la bixiyaa kaliya hal mar sannad dugsiyeedkiiba, marka laga reebo in koobi sidoo kale la bixiyo:

(a) Marka la gaaro gudbinta hore ama codsigaaga qiimeynta;
(b) Markii la helo cabashadaada ugu horeysa ee Gobolka iyo marka lagu helo cabashadaada nidaam cadaalada ee ugu horreysa gudaha sannad dugsiyeedka;
(c) Markii go'aan la gaaro si loo qaado tallaabo edbin oo ka dhan canugaaga taasoo ka kooban beddelka meeleynta; iyo
(d) Markii aad codsatid.

**Fadlan kala xiriir dugsiga degmada wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqahaan:**

*Geli calaamada halkaan*

**Wixii sharaxaad dheeraad ah waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa:**
**Xallinta Khilaafaadka Waxbarashada Gaarka ah ee Idaho, Waaxda Waxbarashada Gobolka**
P.O. Box 83720 Boise, ID 83720-0027
Taleefonka: (208) 332-6914
Fakiska: (208) 334-2228
Websaydka: www.sde.idaho.gov Lambarka bilaashka ah: (800) 432-4601
V/TT: (800) 377-3529

**Si aad u hesho caawinaad dheeraad ah ee arrimaha la xiriira xallinta khilaafka, waxaad la xiriiri kartaa:**

***Xafiiska Idaho Boise ee Xuquuqaha Naafada***
9542 W. Bethel Court
Boise, ID 83709-0569
Taleefonka: (208) 336-5353
Lambarka bilaashka: (800) 632-5125
Fakiska: (208) 336-5396
Websaydka: disabilityrightsidaho.org

***Adeegyada Kaalmada Sharciga Idaho***
1447 Tyrell Lane
Boise, ID 83706
Taleefonka: (208) 336-8980
Fakiska: (208) 342-2561
Websaydka: idaholegalaid.org

***Xafiiska Idaho Pocatello ee Xuquuqaha Naafada***
1246 Yellowstone Ave Suite A-3
Pocatello, ID 83201-4374
Taleefonka: (208) 232-0922
Lambarka bilaashka: (866) 309-1589
Fakiska: (208) 232-0938
Websaydka: disabilityrightsidaho.org

***Ururka Xirfadlayaasha Qareenada Gobolka Idaho***
P.O. Box 895 Boise, ID 83701
Taleefonka (208) 334-4500
Fakiska: (208) 334-4515
Websaydka: isb.idaho.gov

***Idaho Parents Unlimited, Inc. (IPUL)***
4619 Emerald, Ste. E Boise, ID 83702
Taleefonka: (208) 342-5884
Lambarka bilaashka: (800) 242-IPUL (4785)
V/TT: (208) 342-5884
Fakiska: (208) 342-1408
Websaydka: ipulidaho.org

***Boggaga Jaalaha ee loogu talagalay Carruurta Wrightslaw Idaho***
Websaydka: yellowpagesforkids.com/help/id.htm

## ***WARBIXINTA GUUD***

***OGEYSIIS HORAY LOO QORAY***
***34 CFR §300.503***
**Ogeysiis**
Dugsiga degmadaada waa inuu ku siiyo ogeysiis qoraal ah (kugu siyaa macluumaad gaar ah qoraal ahaan), oo waqti macquul ah horteeda:

1. Soo jeedi in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada canugaaga, ama siinta canugaaga FAPE (waxbarashada guud ee ku habboon oo bilaash ah); **ama**
2. Diidaa in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada canugaaga, ama siinta canugaaga FAPE.

**Nuxurka ogeysiiska**
Ogeysiiska qoraalka ah waa inuu:

3. Sharaxaa tallaabada uu dugsiga degmadaada soo jeediyo ama uu diido inuu qaado;
4. Faahfaahiyaa sababta dugsiga degmadaada u soo jeedinayo ama u diidayo in uu tallaabada qaado;
5. Sharaxaa habraaca dabagal kasta, qiimeynta, diiwaanka, ama wargelinta dugsiga degmadaada u isticmaalay go'aaminta lagu soo jeedinayo ama lagu diidayo tallaabada;
6. Ku daraa bayaan ah inaad leedahay illaalin sida waafaqsan qodobada ilaalada habraacyada ee Qeybta B ee IDEA;
7. Kuu sheegaa sida aad ku heli karto qeexida ilaalada habraacyada haddii tallaabada uu dugsiga degmadaada uu soo jeedinayo ama uu diidayo aysan aheyn tixraac hore ee qiimeynta;
8. Ku dartaa illaha aad kula xiriirtid caawinta aad ku fahamtid Qeybta B ee IDEA;
9. Sharaxaa dooqyada kale ee Kooxda IEP (barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee canugaaga) ay tixgeliyeen iyo sababaha doorashooyinkaas loo diiday; **iyo**
10. Ku siiyaa qeexida sababaha kale ee sababta dugsiga degmadaada u soo jeediyay ama u diiday tallaabada.

**Ogeysiiska ku qoran luuqad la fahmi karo**
Ogeysiiska waa inuu:

1. Ku qornaadaa luuqad ay dadweynaha guud fahmi karaan;
   **iyo**
2. Mid lagu bixiyay luqadaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed oo aad isticmaasho, hadiii aysan ahayn in si cad u suurta gal ahayn in sidaas la sameeyo.

Haddi afkaaga hooyo ama habka kale ee wada xidhiidhka aanu ahayn luqad qoran, dugsiga degmadaadu waa inuu xaqiijiyaa in:

1. Ogeysiiska si hadal ahaan ah lagugu turjumo afkaaga hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed;
2. Aad fahantay waxa ku qoran ogaysiiska; iyo
3. In ay jirto cadayn qoran oo sheegaya in shuruudaha cutubyada 1 iyo 2 la buuxiyey.

***LUUQADDA HOOYO***
***34 CFR §300.29***
*Luuqadda hooyo*, marka loo isticmaalo shaqsi leh aqoonta luuqadda ingiriisiga oo xaddidan, macnaheedu waa kuwan soo socda:

1. Luuqadda uu qofkaasi sida caadiga ah u isticmaalo, ama, marka laga hadlayo ilmaha, luqadda sida caadiga ah ay isticmaalaan waalidka ilmaha;
2. Dhammaan xidhiidhka tooska ah ee ilmaha (ay ku jirto qiimaynta ilmaha), luqadda uu ilmuhu sida caadiga ah ugu isticmaalo guriga ama deegaanka waxbarashada.

Qofka dhegoolka ama indhoolaha ah, ama qof aan lahayn luqad qoran, habka wada-xidhiidhku waa waxa uu qofku caadi ahaan u isticmaalo (sida luqadda dhegoolaha, Farta Indhoolaha, ama isgaarsiinta hadalka ah).

***IIMAYL***
***34 CFR §300.505***

Haddii dugsiga degmadaadu uu u soo bandhigo waalidiinta ikhtiyaarka ah ku helitaanka dukumeentiyada iimayl ahaan, waxaad dooran kartaa inaad ku hesho iimaylka waxyaabaha soo socda:

1. Ogeysiiska horay loo sii qoray;
2. Ogeysiiska ilaalinta habraacyada; **iyo**
3. Ogeysiisyada la xidhiidha cabashada nidaam cadaaladeedka.

***OGGOLAANSHAHA WAALIDKA - QEEXITAANKA***
***34 CFR §300.9***
**Oggolaanshaha**
*Oggolaanshaha* macnahiisu waa:

1. In si buuxda laguugu sheegay luqadaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed (sida luuqadda dhegoolaha, Farta Indhoolaha, ama isgaarsiinta hadalka ah) dhammaan macluumaadka ku saabsan tallaabada aad ogolaanshaha ku bixineyso.
2. In aad fahantay oo aad qoraal ahaan ku ogolaatay tallaabadaas, iyo in ogolaanshahu qeexayo tallaabadaas oo uuna liis gareenayo diiwaanada (haddii ayba jiraan) kuwaas oo la sii deyn doono iyo cidda loo sii dayn doono; **iyo**
3. Inaad fahamsan tahay in oggolaanshahaagu ka yahay mid ikhtiyaari ah dhinacaaga iyo inaad ka noqon karto oggolaanshahaaga wakhti kasta.

Haddii aad rabto inaad ka noqoto (buriso) oggolaanshahaaga ka dib marka ilmahaagu bilaabo inuu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, waa inaad sidaas ku samaysaa qoraal. Ka noqoshadaadu ma burinayso (ka laabaneyso) tallaabo dhacday kadib markii aad bixisay ogolaanshahaaga balse ka hor intaadan ka noqon. Intaa waxaa dheer, in dugsiga degmadu looga baahneyn inuu dib u saxo (baddelo) diiwaanada waxbarashada ilmahaaga si uu meesha uga saaro gudbin kasta oo ilmahaagu ku helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ka dib markaad ka laabato ogolaanshahaaga.

***OGGOLAANSHAHA WAALIDKA***
***34 CFR §300.300***
**Oggolaanshaha qiimaynta hore**
Dugsiga degmadaadu kuma samayn karo qiimaynta hore ubadkaaga si ay u go'aamiyo in ilmahaagu u qalmo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA si uu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha iyasa oo aan marka hore ku siin ogaysiis horay loo sii qoray oo ku saabsan talaabada la soo jeediyay iyo helitaanka ogolaanshahaaga sida lagu qeexay hoosta ciwaanada ***Ogeysiiska Horay Loo Sii Qoray*** iyo ***Oggolaanshaha Waalidka.***
Dugsiga degmadaadu waa inuu sameeyaa dadaal macquul ah si uu u helo ogolaanshahaaga xog ogaal aad u tahay ee ku aadan qiimaynta hore si uu go'aan uga gaadho in ilmahaagu yahay ilmo naafo ah iyo in kale.
Oggolaanshahaaga qiimaynta hore macnaheedu ma'aha inaad sidoo kale siisay oggolaanshahaaga dugsiga degmada inuu bilaabo siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga.
Dugsiga degmadaadu ma isticmaali karo diidmadaada ku aadan oggolaansho siinta hal adeeg ama hawl taasoo la xidhiidha qiimaynta hore iyada oo saldhig u ah diidmada ku aadan adiga ama ubadkaaga adeeg, dheef/faa'iido, ama hawl kale, haddii aysan ahayn shuruud kale oo Qaybta B uga baahan tahay in dugsiga degmadu sidaas sameeyo.
Haddii ilmahaagu ka diiwaangashan yahay dugsiga dawlada ama aad dooneyso inaad ilmahaaga ka diiwaan geliso dugsiga dadweynaha oo aadna diidday inaad bixiso ogolaanshaha ama aad ka jawaabi wayday codsiga ah inaad bixiso ogolaanshaha qiimaynta hore, dugsiga degmadaada ayaa laga yaabaa, laakiin looguma baahna, in uu raadiyo in uu ku sameeyo qiimaynta hore ee ilmahaaga asagoo isticmaalaya dhexdhexaadinteeda ama cabashada nidaam cadaaladeedka, kulan xallineed, iyo habraacyada dacwad dhegeysiga ee nidaam cadaaladeedka eex la'aanta ah ee IDEA. Dugsiga degmadaadu ma jabin doono waajibaadkiisa ku aadan inuu helo, aqoonsado oona qiimeeyo ilmahaaga haddi uusan ku sii socon qiimaynta ilmahaaga xaaladahan.

**Xeerarka gaarka ah ee loogu talagalay qiimaynta hore <u>ilmaha kujiro gacanta hay'adaha daryeelka caruurta dadweynaha ee Gobolka</u>**
Haddii ilmuhu yahay mid kujiro gacanta hay'adaha daryeelka caruurta dadweynaha ee Gobolka oo aanu la noolayn waalidkiis ama waalidkeeda -
Dugsiga degmadu uma baahna ogolaanshaha waalidka ee ku aadan qiimaynta hore si loo go'aamiyo haddii ilmuhu yahay ilmo naafo ah haddii:

1. Inkasta oo ay jiraan dadaallo macquul ah oo lagu samaynayo sidaas, dugsiga degmadu uusan heli karin waalidka ilmaha;
2. Xuquuqda waalidka loo joojiyay si waafaqsan sharciga gobolka; ama
3. Garsoore uu u xilsaaray shakhsi aan ahayn waalidka xaq u lahaanshaha gaadhida go'aanada waxbarasheed oo qofkaasina uu bixiyay ogolaanshaha qiimaynta hore.

***Ilmo kujira Gacanta Hay'adaha Daryeelka Caruurta Dadweynaha ee Gobolka***, sida loogu isticmaalo gudaha IDEA, macneheedu waa ilmo kaas oo, sida ay go'aamisay Gobolka uu ilmuhu ku nool yahay, yahay:

1. Ilmo la korsado;
2. Loo tixgeliyo ilmo kujira gacanta hay'adaha daryeelka caruurta dadweynaha ee Gobolka marka loo eego sharciga Gobolka; **ama**
3. Kujira gacanta hay'adda daryeelka carruurta ee dadweynaha.

Waxaa jira hal ka reeban oo ay tahay inaad ogaato. Ilmaha kujira gacanta hay'adaha daryeelka caruurta dadweynaha ee Gobolka kuma jiro ilmo la korsado oo leh waalid korineed kaasoo buuxiya qeexida waalidka sida loogu isticmaalay IDEA.

**Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan adeegyada**

Dugsuga degmadaadu waa inuu helaa ogolaanshahaaga xog ogaalka aad u ahayd ka hor intaysan siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ubadkaaga marka ugu horeysay.

Dugsiga degmadaadu waa inuu sameeyaa dadaal macquul ah si uu u helo ogolaanshahaaga xog ogaalka aad u ahayd ka hor intaysan siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ubadkaaga marka ugu horeysay.

Haddii aadan ka jawaabin codsiga ah ku aadan inaad bixiso oggolaanshahaaga ku aadan in ilmahaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horeysay, ama haddii aad diido inaad bixiso ogolaanshaha noocaas oo kale ama aad gadaal ka buriso (baajiso) oggolaanshahaada qoraal ahaan, dugsi degmadaadu ma isticmaali karaan ilaalinta habraaca (waxaa loola jeedaa, dhexdhexaadinta, cabashada nidaam cadaaladeedka, kulan xallineed, ama dhageysiga habraaca cadaaladeed ee dhexdhexaad ah) si loo helo heshiis ama go'aan ah in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (oo ay ku taliyeen kooxda IEP ee ilmahaada) in la siiyo ilmahaaga la'aanta ogolaanshahaaga. Haddi aad diido inaad bixiso ogolaanshahaaga ubadkaagu inuu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada laxidhiidha markii ugu horaysay, ama hadii aad ka soo jawaabi waydo codsiga ah inaad bixiso oggolaanshaha noocaas oo kale ama aad gadaal ka buriso (baajiso) oggolaanshahaada qoraal ahaano oo dugsiga degmaduna siin ilmahaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee ay ku doondoontay oggolaanshahaaga, dugsiga degmadaadu:

1. Kuma xadgudbaayo shuruuda ah in uu uga dhigo waxbarashada dadweynaha ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid u diyaar ah ubadkaaga ku guul daraysigeeda ku aadan siinta adeegyadaas ubadkaaga; **oona**
2. Loo baahnayn in la qabto kulan looga hadlaayo barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ama loogu curinaayo IEP ilmahaaga kaas oo loogu talagalay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kuwaas oo ogolaanshahaaga lagu codsaday.

Haddii aad uga noqoto (buriso) oggolaanshahaaga qoraal ahaan mar kasta ka dib marka ubadkaagu marka hore la siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, markaa dugsiga degmadu ma sii wadi karo bixinta adeegyadaas oo kale, laakiin waa inay ku siiyaan ogaysiis hore oo qoraal ah, sida lagu qeexay hoosta cinwaanka ***Ogeysiiska Horay Loo Qoray***, ka hor inta aan la joojin adeegyadaas.

**Xaqa Uu Waalidku U Leeyahay Inuu Diido**

Markaad ogolaato bilaabashada hore ee adeegyada, dugsiga degmada loogama baahna inuu helo ogolaanshahaaga si uu isbedel ugu sameeyo IEP-ga. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan rabin in dugsiga degmadu hirgeliyo isbeddellada IEP, waa inaad ku soo gudbisaa diidmadaada qoraal ahaan. Diidmooyinkaada qoraal ahaanta ah waa in ay qabto caalamada boostada ama gacanta loogu keenaa dugsiga degmada 10 maalmood gudahooda kadib markaad hesho ogeysiiska qoraal ahaanta ah ee ku saabsan isbeddelada.
IDAPA 8.02.03.109.0Sa

**Oggolaanshaha waalidka ee ku aadan dib u qiimeynada**

Dugsiga degmadaadu waa inuu helaa ogolaanshahaaga aad xog ogaalka u ahayd ka hor inta aanay dib u qiimayn ilmahaaga, haddii aysan ahayn in dugsiga degmadaadu ay muujin karaan taas:

1. Ineey qaadeen tillaabooyin macquul ah si loo helo oggolaanshahaaga dib-u-qiimaynta ilmahaaga; **oo**
2. Aadan ka soo jawaabin.

Haddii aad diido inaad oggolaansho siiso dib u qiimaynta ilmahaaga, dugsiga degmada ayaa laga yaabaa, laakiin loogama

baahna inay, iney ku raadiyaan qiimaynta ubadkaaga iyagoo isticmaalaya dhexdhexaadin, cabashada nidaamka cadaaladeedka, kulan xallineed, iyo nidaamka dacwad dhegaysiga cadaalada ah si ay u raadiyaan inay meesha ka saaraan diidmadaada ku aadan ogolaanshaha dib u qiimaynta ilmahaaga. Marka la eego qiimaynadii hore, dugsiga degmadaadu kuma xad gudbin waajibaadkiisa sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA haddii uu diido inuu sidan ku sii raadiyo dib u qiimaynta.

**Dukumeenti ahaan u dhigida dadaalka macquulka ah ee lagu helaayo ogolaanshaha waalidka**

Dugsigaa degmadaadu waa inuu hayaa dukumeentiyeenta dadaalada macquulka ah si uu u helo ogolaanshahaaga qiimaynta hore, si uu u siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha marka ugu horeysa, dib u qiimayn, iyo ku helida waalidiinta ilmaha kujiro gacanta hay'adaha daryeelka caruurta dadweynaha ee Gobolka qiimaynaha hore. Dukumeentiyeentu waa in ay ku jiraan diiwaanka ay ku qoran yihiin isku dayga dugsiga degmada ee meelahan, sida:

1. Warbixino faahfaahsan ee wicitaanada taleefoonada ee la sameeyay ama la isku dayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas;
2. Koobiyada waraaqaha loo diray waalidiinta iyo jawaabaha laga helay; **iyo**
3. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan booqashooyinka gurigaaga ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

**Shuruudaha oggolaanshaha ee kale**

Ogolaanshahaaga looma baahna ka hor inta aanay dugsiga degmadaada laga yaabo:

1. Inuu dib u eegis ku sameeyo xogta jirta taas oo qayb ka ah qiimaynta ilmahaaga ama dib u qiimaynta; **ama**
2. Inuu siiyo ilmahaaga imtixaan ama qiimayn kale oo la siiyo dhammaan carruurta haddii aysan ahayn, in ka hor imtixaankaas ama qiimayntaas, ogolaanshaha looga baahan yahay waalidiinta dhamaan carruurta oo dhan.

Dugsiga degmadu waa inuu sameeyaa oo uu fulisya habraacyada lagu xaqiijinayo in diidmadaada ku aadan oggolaanshahaaga mid ka mid ah adeegyadan iyo hawlahan aanay keenin guuldarro ah in la siin waayo ilmahaaga waxbarasho dadweyne oo ku habboon oo bilaash ah (FAPE). Sidoo kale, dugsiga degmadaadu uma isticmaali karo diidmadaada inaad bixiso oggolaansho ku aadan mid ka mid ah adeegyadan ama hawlahan sal uu ugu diidi karo adeeg, dheef, ama hawl kastoo kale ilmahaada, haddii aysan ka ahayn in shuruudo kale oo Qaybta B ay uga baahan tahay dugsiga degmadda inay sidaas samayso.

Haddii aad ilmahaaga ka diiwaangelisay dugsi gaar loo leeyahay adoona adeegsanaya kharashkaaga ama haddii aad guriga waxbarashada ugu qabatay ilmahaaga, oo aadan siin ogolaanshahaaga qiimaynta hore ee ubadkaaga ama dib u qiimaynta ilmahaaga, ama aad ku guul-dareysato inaad ka jawaabto codsiga la rabo inaad ku bixiso ogolaanshahaada, dugsiga degmadaadu ma isticmaali karo habraacyadiisa xallinta khilaafaadka (tusaale, dhexdhexaadin, cabashada nidaamka cadaaladeed, kulan xallineed, ama dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeed eex la'aan ah) oo loogamana baahna inuu u tixgeliyo ubadkaaga mid u qalma inuu helo adeegyo loo siman yahay (adeegyada loo fidiyay qaar ka mid ah carruurta naafada ah ee dugsiga gaar loo leeyahay ee ay waalidku ku meeleeyeen).

***QIIMEYNTA WAXBARASHADA EE MADAXBANAAN***
***34 CFR §300.502***

**Guud ahaan**

Sida hoos lagu sharaxay, waxaad xaq u leedahay inaad hesho qiimaynta waxbarashada madaxa banaan (independent educational evaluation, IEE) ee ubadkaaga haddii aadan ku raacsanayn qiimaynta ilmahaaga ee ay heshay dugsiga degmadaada. Haddii aad codsato qiimayn waxbarasho oo madax-banaan, dugsiga degmadu waa inuu ku siiyaa macluumaadka ku saabsan halka aad ka heli karto qiimayn waxbarasho oo madax-banaan iyo shuruudaha dugsiga degmada ee khuseeya qiimaynaha waxbarasho ee madaxa banaan.

**Qeexitaannada**

Qiimaynta waxbarashada madaxa banaan macneheedu waa qiimayn uu sameeyo imtaxaane aqoon leh oo aan u shaqayn dugsi degmada ee masuulka ka ah waxbarashada ubadkaaga.

Kharashka dawlada/danta-guud waxa loola jeedaa in dugsigu degamdu u bixinaayo kharashka dhameystiran ee qiimaynta ama xaqiijiyo in qiimayntu si kale laguugu siiyay oo kharash la'aan ah, si waafaqsan qodobada Qaybta B ee IDEA, taas oo u ogolaanaysa Gobol kasta in uu isticmaalo illo taageereedka laga heli karo Gobol kasta, deegaanka , Federaalka, iyo ilaha gaarka ah gudaha Gobolka si loo buuxiyo shuruudaha Qaybta B ee Sharciga.

**Xaq u lahaanshaha qiimaynta iyadoo la isticmaalayo khrashka dawlada**

Waxaad xaq u leedahay qiimaynta waxbarashada madaxa banaan ee ilmahaaga oo ayna kharashku bixinayso dawlada haddii aanad ku raacsanayn qiimaynta ilmahaaga ee ay heleen dugsiga degmadaada, iyadoo la raacayo shuruudaha soo socda:

1. Haddii aad codsato qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ku saabsan ilmahaaga adoona adeegsanaya kharashka dawlada, dugsiga degmadaadu waa in, iyada oo aan dib loo dhigin aan loo baahnayn, midkood: (a) Xareeyaa cabashada habraaca cadaaladeed si uu u codsado dacwad dhageysi si uu u muujiyo in qiimayntiisa ee ku aadan ubadkaagu ay haboontahay; **ama** (b) Bixiyo qiimayn waxbarasho oo madax-banaan oo uuna isticmaalayo kharashka dawlada, haddii aysan ahayn in dugsiga degmadaadu ay ku muujiyaan dacwad dhegeysi in qiimaynta ilmahaaga ee aad heshay aanay buuxin shuruudaha dugsiga degmada.
2. Haddii dugsiga degmadaada uu codsado dacwad dhageysi oo uuna go'aanka kama dambaysta ah uu noqdo in qiimaynta dugsiga degmadaada ee ilmahaaga ay haboon tahay, waxaad weli xaq u leedahay qiimayn waxbarasho oo madax banaan, laakiin maaha mid ay bixineyso kharashka dawlada.
3. Haddii aad codsato qiimaynta waxbarashada madaxa banaan ee ilmahaaga, dugsiga degmada waxa laga yaabaa inay ku wayddiiyaan sababta aad u diiddan tahay qiimaynta ilmahaaga ee ay heleen dugsigaaga degmada.

4. Si kastaba ha ahaatee, dugsiga degmadaadu waxa laga yaabaa in aanay u baahnayn sharaxaad lagana yaabo in aanay si aan macquul ahayn dib ugu dhigin midkood bixinta qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan ee ubadkaaga oo ayna dabooleyso kharashka dad waynaha ama ka xeraynta cabasho nidaam cadaaladeed si aad u codsato dacwad dhagaysi cadaalad ah si looga difaaco dugsiga degmada dacwada ku aadan qiimaynta ilmahaaga.

Waxa aad xaq u leedahay hal qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ilmahaaga oo ayna dabooleyso kharashka dawlada mar kasta oo dugsiga degmadaadu ay sameeyaan qiimaynta ubadkaaga taas oo aad diidan tahay.

**Qiimeynada Ay Waalidiintu-bilaabeen**

Haddii aad hesho qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ilmahaaga iyadoo la adeegsanayo kharashka dawladda ama aad la wadaagto dugsiga degmada qiimaynta ilmahaaga oo aad ku heshay kharash shakhsi ahaaneed:

1. Dugsiga degmadaadu waa inay tixgeliyaan natiijooyinka qiimaynta ilmahaaga, haddii ay buuxiso shuruudaha dugsiga degmada ee loogu talagalay qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan, go'aan kasta oo la gaadho ee la xidhiidha bixinta waxbarashada guud ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) ubadkaaga; **oona**
2. Adiga ama dugsiga degmadaada laga yaabaa inaad ku soo bandhigtaan qiimaynta caddayn ahaan waqtiga dacwad dhegeysiga nidaam cadaaladeedka ee khuseeya ilmahaaga.

**Codsiyada ku aadan qiimeynta ee saraakiisha dacwada dhegeysanayaan**

Haddii sarkaalka dacwada dhegaysanaya uu codsado qiimayn waxbarasho oo madaxbannaan oo ku saabsan ilmahaaga si qayb ka ah dacwad dhegeysiga nidaam cadaaladeedka, kharashka qiimayntu waa inuu noqdaa mid ay dawladdu bixiso.

**Shuruudaha dugsiga degmada**

Haddii qiimayn waxbarasho oo madax-banaani ay bixineyso kharashka dawlada, shuruudaha habka qiimaynta lagu helay, oo ay ku jiraan goobta qiimayntu ka dhacayso iyo shahaadooyinka imtixaan qaadaha, waa inay la mid noqdaan shuruudaha ay degmadu adeegsato marka ay bilaabayso qiimayn (ilaa xadka shuruudahaasi ay waafaqsan yihiin xaqa aad u leedahay qiimayn waxbarasho oo madax banaan).

Marka laga reebo shuruudaha kor lagu sharraxay, dugsiga degmada ma soo rogi karaan shuruudo ama wakhtiyo la xidhiidha helitaanka qiimayn waxbarasho oo madax-bannaan oo ay dawladdu kharashkeeda bixineyso.

## ***SIR AHAANSHAHA MACLUUMAADKA***

***SIR AHAANSHAHA MACLUUMAADKA***
***34 CFR §300.502***
Sida loogu adeegsaday ciwaanka **Sir ahaanshaha Macluumaadka:** ***Burburinta*** macneheedu waa burburin jireed ama ka saarida aqoonsiga shakhsi ahaaneed emacluumaadka si aan macluumaadka loogu sii aqoonsan karin shakhsi ahaan.
***Diiwaanada waxbarashadu*** macnehoodu waa nooca diiwaanada lagu daboolay qeexida "diwaanada waxbarashada" ee gudaha 34 CFR Qaybta 99 (xeerarka fulinaya Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada ee 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
***Wakaalad ka qayb qaadata*** macneheedu waa dugsi degmadeed, wakaalad ama hay'ad machad oo kasta kaasoo uruuriya, ilaaliya, ama adeegsada macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, ama macluumaadka lagu helay, sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

***SHAKHSI AHAAN LAGU AQOONSAN KARO***
***34 CFR §300.32***
Shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo macneheedu waa macluumaadka ay ka mid yihiin:
(a) Magaca ilmahaaga, magacaaga ka waalid ahaan, ama magaca xubin kale oo qoyska ah;
(b) Cinwaanka ilmahaaga;
(c) Aqoonsiga shakhsi ahaaneed, sida lambarka soshal sekuritiga ama lambarka ardayga ee ilmahaaga; **ama**
(d) Liiska sifooyinka gaarka ah ama macluumaadka kale ee suurtogal ka dhigaya in lagu aqoonsado ilmahaaga si macquul ah.

***OGEYSIISKA KU SOCDA WAALIDIINTA***
***34 CFR §300.612***
Wakaalada Waxbarashada Gobolka waa in ay siisaa ogaysiis ku filan si ay si buuxda ugu wargaliso waalidiinta wixii ku saabsan sirta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo, oo ay ku jiraan:
1. Sharaxaada heerka uu gaarsiisan yahay ogeysiiska lagu bixiyo afka hooyo ee kooxaha kala duwan ee dadweynaha ee jooga gudaha Gobolka;
2. Sharaxaada carruurta laga hayo macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, noocyada macluumaadka la raadinayo, hababka Dawladdu doonayso in ay u isticmaasho ururinta macluumaadka (oo ay ku jiraan ilaha xogta laga soo ururiyay), iyo isticmaalka loo adeegsan doono macluumaadka;
3. Soo koobida siyaasadaha iyo nidaamyada ay tahay in hay'adaha ka qaybqaata ay raacaan ee ku saabsan kaydinta, u shaacinta qolo saddexaad, haynta, iyo burburinta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo; **iyo**
4. Sharaxaad ku saabsan dhammaan xuquuqda waalidiinta iyo carruurta ee ku saabsan macluumaadkan, oo ay ku jiraan xuquuqaha hoos yimaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA) iyo xeerarkeeda dhaqangelinta ee 34 CFR Qaybta 99.

Kahor waxqabad kasta oo weyn oo lagu aqoonsanayo, lagu helaayo, ama lagu qiimeenayo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha (sidoo kale loo yaqaan "helitaanka ilmaha"), ogeysiisku waa in lagu daabacaa ama lagu shaaciyaa wargeysyada ama warbaahinta kale, ama labadaba, kaas oo leh wargudbin dad badan gaaraya si uu u ogaysiiyo waalidka jooga Gobolkoo dhan hawlahan.

***XUQUUQDA HELITAANKA***
***34 CFR §300.613***
Wakaalada ka qeybqaadaneysa waa in ay kuu ogolaataa inaad kormeerto oo aad dib u eegto diiwaano kasto oo waxbarasheed oo la xidhiidha ubadkaaga ee la soo ururiyay, la hayo, ama uu isticmaalo dugsiga degmadaada sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA. Wakaalada ka qeybqaadaneysa waa in ay u hogaansataa codsigaaga ah in aad kormeer iyo dib u eegist ku sameyso diwaano kastoo ku saabsan waxbarashada ubadkaaga iyada oo aan lagu sameynin dib u dhac aan loo baahnayn iyo ka hor kulan kasta oo khuseeya barnaamijka waxbarashada gaarka ah (individualized education program, IEP), ama dacwad dhageysi kasta oo cadaaladeed dhexdhexaad ah (oo ay ku jiraan kulan xal lagu raadinayo ama dacwad dhegeysiga ku saabsan anshaxa), iyo kiis kasta oo aan ka badnayn 45 maalmood ka dib markaad codsiga sameyso.
Xaqa aad u leedahay inaad kormeerto oo aadna dib u eegto diiwaanada waxbarashada waxa ka mid ah:
1. Xaqa aad u leedahay in aad jawaab-celin ka hesho wakaalada ka qeybqaadaneyso taasoo ku aadan codsiyadaada

macquulka ah ee u helida sharaxaado iyo fasiraado diiwaanada;
2. Xaqa aad u leedahay in aad codsato in wakaalada ka qeybqaadaneysa ay ku siiso koobiyada diiwaanka haddii aanad si wax ku ool ah u baadhin oo aad dib u eegis u samayn karin diiwaanada ilaa aad hesho nuqulladaas; **iyo**
3. Xaqa aad u leedahay in wakiilkaagu uu kormeero oona dib u eego diiwaanada.

Wakaalada ka qeybqaadaneysa waxay u qaadan karaan inaad awood u leedahay inaad kormeerto oo aad dib u eegto diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga haddii aysan ahayn in lagugula taliyo inaadan awood u lahayn marka loo eego sharciga Gobolka ee lagu dabaqi karo arrimaha sida mas'uuliyadda, kala tagga iyo furiinka.

***DIIWAANKA HELITAANKA***
***34 CFR §300.614***

Wakaalad kasta oo ka qeybqaadaneysa waa in ay heysaa diiwaanka dhinacyada hela marin u helka diiwaanada waxbarasho ee lasoo ururiyay, la hayo, ama la isticmaalay sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA (marka laga reebo helitaanka waalidiinta iyo shaqaalaha idman ee wakaalada ka qeybqaadaneysa) , oo ay ku jiraan magaca qoloda, taariikhda la siiyay marin u helka xogta, iyo ujeedada qoloda loo siiyay oggolaasha ineey isticmaalaan diiwaannada.

***DIIWAANADA IN KA BADAN HAL ILMO***
***34 CFR §300.615***

Haddii diiwaan kastoo waxbarashadeed ay ku qoran yihiin macluumaadka hal cunug ka badan, waalidiinta carruurtaas waxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan oo ay dib u eegis ku sameeyaan kaliya macluumaadka la xiriira ilmahooda ama in lagu wargeliyo macluumaadkaas gaarka ah.

***LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA***
***34 CFR §300.616***

Kadib marka codsasho la sameeyo, wakaalad kasta oo ka qeybqaadaneysa waa in ay ku siiyaan liiska noocyada iyo goobaha laga heli karo diiwaanka waxbarashada ee la soo ururiyay, lagu hayo, ama ay isticmaasho wakaaladu.

***KHIDMADAHA***
***34 CFR §300.617***

Wakaalad kasta oo ka qeybqaadaneysa waxa laga yaabaa inay kaa qaado kharash koobiyada diiwaanka laguugu sameeyay sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA haddii khidmadaadu aanay si wax ku ool ah kaaga hor istaagin inaad isticmaasho xaqa aad u leedahay inaad kormeerto oo aadna dib u eegto diiwaanadaas.
Wakaalada ka qaybqaadanaysaa kaama khidmad si ay kuugu raadiso ama kuugu soo saarto macluumaad sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

***WAX KA BEDDELKA DIIWAANADA IYADOO AH CODSIGA WAALIDIINTA***
***34 CFR §300.618***

Haddii aad aaminsantahay in macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga ee la soo ururiyay, la hayo, ama la isticmaalo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabin ah, ama ku xad-gudbeysa asturnaanta ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waxaad ka codsan kartaa wakaalada ka qeybqaadaneysa ee haysa xogta ineey bedelaan macluumaadka.
Wakaalada ka qeybqaadaneysa waa in ay go'aan ka gaadhaa in la beddelo macluumaadka si waafaqsan codsigaaga muddo macquul ah gudahooda marka la helo codsigaaga.
Haddii wakaalada ka qeybqaadaneysa ay diido inay u beddesho macluumaadka si waafaqsan codsigaaga, waa inay kugu wargeliso diidmada oo ay kugula taliso xaqaada aad u leedahay dacwad dhegaysi sida lagu sharraxay hoosta ciwaanka **Fursada Dacwad Dhagaysiga**.

***FURSADA DACWAD DHAGAYSIGA***
***34 CFR §300.619***

Wakaalada ka qeybqaadaneysa waa in, haddii la codsado, ay ku siiso fursad dacwad dhegaysi si aad uga dooddo macluumaadka ku jira diiwaannada waxbarashada ee ku saabsan ilmahaaga si loo xaqiijiyo in aanay sax ahayn, marin habaabin yihiin, ama haddii kale ku xad-gudbayaan asturnaanta ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga.

***HABRAACYADA DACWAD DHAGEYSIGA***
***34 CFR §300.621***

Dacwad dhageysiga ka dhan ah macluumaadka ku jira diiwaannada waxbarashada waa in loo fuliyaa si waafaqsan nidaamka dhageysiyadaas oo kale sida hoos timaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada (FERPA).

***NATIIJADA DACWAD DHAGEYSIGA***
***34 CFR §300.620***

Haddii, si ah natiijada ka soo baxday dacwad dhageysiga, wakaalada ka qeybqaadaneysa ay go'aansato in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin-habaabin ah, ama haddii kale ku xad-gudbaya sirta ama xuquuqaha kale ee ubadkaaga, waa inay u beddesho macluumaadka si habboon oona si qoraal ah kugu wargeliyaan adiga.

Haddii, si ah natiijada ka soo baxday dacwad dhageysiga, wakaalada ka qeybqaadaneyso ay go'aansato in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin-habaabin ah, ama haddii kale ku xad-gudbaya sirta ama xuquuqaha kale ee ubadkaaga, waa inay kugu wargeliso xaqa aad u leedahay inaad ku meeleyso diiwaanada in ay ku hayso ilmahaaga bayaan ka faalloonaya macluumaadka ama bixinaya sabab kasta oo aad ku khilaafsan tahay go'aanka wakaalada ka qeybqaanadeysa. Sharaxaada noocaas oo kale ee lagu meeleeyo diiwaanka ilmahaaga waa in:

1. In ay u hayaan wakaalada ka qeybqaadaneysa si qayb ka mid ah diiwaanada ubadkaaga ilaa inta diiwaanka ama qaybta lagu muransan yahay ay hayso wakaalada ka qeybqaadaneysa; **iyo**
2. Haddii wakaalada ka qeybqaadaneysa ay u shaaciso diiwaanka ubadkaaga ama macluumaadka la isku haysto qolo kasto, sharraxaadda waa in sidoo kale loo bandhigaa qolodaas.

***OGGOLAANSHAHA KU AADAN SHAACINTA MACLUUMAADKA SHAKHSI AHAAN LA AQOONSAN KARO***
***34 CFR §300.622***

Haddii aysan ahayn in macluumaadka ku jiro diiwaannada waxbarashada, iyo in shaacinta la oggolaaday iyada oo aan oggolaansho waalid laga helin sida hoos timaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA), oggolaanshahaaga waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka shakhsi ahaaneed ee lagu aqoonsan karo aan loo bandhigin dhinacyo aan ahayn mas'uuliyiinta hay'adaha ka qaybgalaya. . Marka laga reebo duruufaha hoos ku xusan, oggolaanshahaaga looma baahna ka hor inta aan macluumaadka shakhsi ahaanta loo aqoonsan karo loo sii dayn saraakiisha wakaaladaha ka qaybqaata sabab ah ujeeddooyinka buuxinta shuruudaha Qaybta B ee IDEA.

Oggolaanshahaaga, ama oggolaanshahaaga ubadka xaqa u leh ee gaadhay da'da qaan-gaarka sida waafaqsan sharciga Gobolka, waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo loo sii dayn saraakiisha hay'adaha ka qayb qaadanaya bixinta ama bixinta adeegyada xilliga kala-guurka. Haddii ilmahaagu uu ku jiro, ama uu aadayo, dugsi gaar loo leeyahay oo aan ku yaaliin isla dugsiga degmada ee aad deggan tahay, oggolaanshahaaga waa in la helaa ka hor inta aan wax macluumaad ah oo shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ilmahaaga aysan isku shaacinin saraakiisha dugsiga degmada ee uu ku yaalo dugsiga sida gaarka ah loo leeyahay iyo masuuliyiinta dugsiga degmada ee meesha aad degan tahay.

***DHAWRITAANADA***
***34 CFR §300.623***

Wakaalad kasta oo ka qeybqaadaneysa waa iney ilaaliysa sirta macluumaadka shakhsi ahaanta lagu aqoonsan karo xilliyadiisa kala ah waqtiga ururinta, kaydinta, shaacinta, iyo burburintaba.

Hal mas'uul oo jooga wakaalada kasta oo ka qeybqaadaneysa waa inuu qaataa mas'uuliyadda uu ku xaqiijinayo sirta macluumaadka shaqsi ahaanta lagu aqoonsan karo.

Dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo waa inay helaan tababar ama tilmaamo ku saabsan siyaasadaha Gobolkaaga iyo nidaamyada ku saabsan sirta sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA).

Wakaalad kasta oo ka qeybqaadaneysa waa iney haysaa, si ula jeedkeedu yahay kormeerka dadweynaha, liiska hadda ee magacyada iyo jagooyinka shaqaalaha hay'adda kuwaas oo heli kara macluumaadka shakhsi ahaanta lagu aqoonsan karo.

***BURBURINTA XOGTA***
***34 CFR §300.624***

Dugsiga degmadaada waa in ay kugu wargeliyaan marka macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ee la soo ururiyey, la hayo, ama loo isticmaalay sida hoos timaada Qaybta b ee IDEA aan loo sii baahnayn si loo siiyo adeegyada waxbarashada ilmahaaga.

Macluumaadka waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, diiwaanka joogtada ah ee magaca, ciwaanka, iyo teleefoonka ilmahaaga, darajooyinkiisa/keeda, diiwaanka imaanshaha, fasalada uu soo xaadiray ama ay soo xaadirtay, heerka fasal ee uu bogay ama ay bogtay, iyo sanadka uu dhammeeyay waa la hayn karaa iyadoona aan lahayn wakhti cayiman.

## ***<u>HABRAACYADA CABASHADA GOBOLKA</u>***

***FARQIGA U DHAXEEYA HABRAACYADA CABASHADA IYO DACWAD DHAGEYSIYADA NIDAAM CADAALEEDKA IYO CABASHADA GOBOLKA***

Xeerarka Qaybta B ee IDEA ayaa dejinaya habraacyo gaar ah oo loogu talagalay cabashooyinka ka dhanka ah Gobolka iyo cabashooyinka nidaam cadaaladeedka iyo dacwad dhageysiyada. Sida hoos lagu faahfaahiyay, shaqsi kasta ama urur kasta waxa uu xeraysan karo cabasho ka dhan ah Gobolka oo uu ku eedaynayo ku xad-gudbida shuruuda Qaybta B ee dugsiga degmada, Wakaalada Waxbarashada Gobolka, ama wakaalado kale oo dawladeed. Adiga ama dugsiga degmada oo keliya ayaa xerayn kara dacwad nidaam cadaalad ah oo ka dhan arrin kasta oo la xidhiidha soo jeedin ama diidmada ku aadan in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmaha naafada ah, ama siinta hab ku habboon oo bilaash ah waxbarashada dadweynaha (FAPE) ilmaha. Iyadoo ay tahay in shaqaalaha Wakaalada Waxbarashada Gobolka guud ahaan ineey ku xaliyaan Cabashada Gobolka gudaha 60-maalin taariikh jadwaleed, ilaa wakhtiga si sax ah loo kordhiyo, sarkaalka dacwad dhagaysiga eex la'aanta ah waa inuu qabto/dhageysto cabashada ka dhanka ah nidaamka cadaalada (haddii aan lagu xalinin kulan xalineed ama dhex dhexaadin) uuna soo saaraa go'aan qoraal ah 45-maalmood gudahooda ka dib dhamaadka xilliga xallinta, sida lagu qeexay dukumeentigan hoos yimaada ciwaanka Habka Xallinta, ilaa sarkaalka dhageysanaya dacwad dhegaysigu bixiyo wakhti kordhin gaar ah asagoo eegaya codsigaaga ama codsiga dugsiga degmada. Cabashada ka dhanka ah Gobolka iyo cabashada nidaam cadaaleedka, habraacyada xallinta iyo dacwad dhageysiyada ayaa si buuxda hoos loogu sifeeyay. Wakaalada Waxbarashada Gobolka waa in ay soo saartaa foomamka moodada ah si ay kaaga caawiyaan xeraynta cabashada nidaamka cadaaladeed iyo in ay kugu caawiyaan adiga iyo qolooyinka kale si aad u xeraysataan cabashada Gobolka sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Foomamka Moodada.***

***QAADASHADA HABRAACYADA CABASHADA GOBOLKA 34 CFR §300.151***

**Guud ahaan**

Wakaalad kasta oo Waxbarasho Goboleed ah waa in ay u lahaataa habraac qoran oo loogu talagalay:

1. Xallinta cabasho kasta, oo ay ku jirto cabasho uu soo gudbiyay urur ama shakhsi ka socda Gobol kale;
2. Ka xareynta cabasho Wakaalada Waxbarashada Gobolka;
3. Sida ballaadhan ugu baahinta habraacyada cabashada Gobolka waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaya, oo ay ku jiraan wakaaladaha tababarta waalidka iyo xarumaha macluumaadka, ilaalinta iyo u doodista, xarumaha lagu noolaado ee madax banaan, iyo qaybaha kale ee ku haboon.

**Xallinta diidmada adeegyada habboon**

Gudaha waqtiga xallinta cabashada Gobolka ee ay Wakaalada Waxbarashada Gobolka ogaatay ku guul-darraysatay ku aadan bixinta adeegyada habboon, Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay wax ka dhahdaa/qabataa:

1. Ku guuldareysiga ku aadan bixinta adeegyada habboon, oo ay ku jiraan tallaabada sixitaanka ee habboon si wax looga qabto baahiyaha ilmaha (sida adeegyada magdhowga ah ama magdhawga lacag-celin ahaanta ah); **<u>iyo</u>**
2. Bixinta habboon ee mustaqbalka ee ku aadan adeegyada dhammaan carruurta naafada qabaan.

***HABRAACYADA UGU YAR EE CABASHADA GOBOLKA***
***34 CFR §300.152***

**Waqtiga xaddidan; habraacyada ugu yar**

Wakaalad kasta oo Waxbarasho Goboleed ah waa in ay ku dartaa habsocodkeeda cabashada Gobolka wakhti xadidan oo ah 60 oo maalmo taariikh jadwaleed ah ka dib marka cabashada loo xareeyo si:

1. Loo sameeyo baaritaan madax-banaan oo goobta ah, haddii Wakaalada Waxbarashada Gobolka ay go'aamiso in

baaritaanku uu lagama maarmaan yahay;
2. Loo siiyo cabashoodaha fursad uu ku soo gudbiyo macluumaad dheeri ah, hadal ahaan ama qoraal ahaan, taas oo ku saabsan eedeymaha ku jira cabashada;
3. Loo siiyo dugsiga degmada ama hay'adaha kale oo dadweyne fursad ay kaga jawaabaan cabashada, oo ay ku jiraan, ugu yaraan: (a) ikhtiyaarka wakaalada, soo jeedin lagu xalinayo cabashada; **iyo** (b) fursad loogu talagalay in waalidka soo gudbiyay cabashada iyo wakaaladu si ikhtiyaari ah ugu heshiiyaan dhexdhexaadin;
4. Dib u eegis loogu sameeyo dhammaan macluumaadka khuseeya oona loo sameeyo go'aan madax bannaan haddii dugsiga degmada ama hay'adaha kale ee dadwayne ay ku xad-gudbayaan shuruudaha Qaybta B ee IDEA; **oona**
5. Loogu soo saaro go'aan qoraal ah qofka cabanaya kaas oo ka hadlaya eedeymo kasta oo ku jira cabashada kana kooban: (a) Natiijooyinka xaqiiq raadinta iyo gunaanado; **iyo** (b) sababaha Wakaalada Waxbarashada Gobolka ee ku aadan go'aankeeda kama danbeysta ah.

**Wakhti kordhinta; go'aanka kama danbeysta ah; hirgelinta**

Habraacyada Wakaalada Waxbarashada Gobolka ee kor lagu tilmaamay waa inay sidoo kale:
1. Ogolaadan waqti kordhinta 60-ka maalmo taariikh jadwaleed ee wakhtiga xaddidan haddii: (a) Duruufo gaar ah ay jiraan marka la eego cabasho Gobol oo gaar ah; **ama** (b) adiga iyo dugsiga degmada ama hay'adaha kale ee dawliga ah ee ku lugta leh si ikhtiyaari ah ugu wada heshishan inaad kordhisaan wakhtiga aad ku xalinaysaan arinta iyadoo loo maraayo habka dhex dhexaadinta ama habab kale oo lagu xaliyo khilaafaadka, haddii laga heli karo gudaha Gobolka.
2. Ku dar habraacyada hirgelinta wax ku oolka ah ee go'aanka kama dambaysta ah ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolka, haddii loo baahdo, oo ay ku jiraan: (a) hawlaha kaalmo farsameedka ah; (b) waan waanta; **iyo** (c) tallaabooyinka sixitaanka si loo gaaro u hoggaansanaanta.

***Cabashooyinka ka dhanka ah Gobolka iyo dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka***

Haddii cabasho Gobol oo qoraal ah la helo taas oo sidoo kale ah mawduuca dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Xareynta Cabashada Nidaam Cadaaladeedka***, ama Cabashada ku aadan Gobolka ay ka kooban tahay arrimo badan kuwaas oo mid ama in ka badan ay qayb ka yihiin dacwad dhegeysiga noocaas ah, Gobolku waa in uu dhinac iska dhigaa qayb kasta oo ka mid ah cabashada Gobolka ee lagu soo hadal qaaday dhageysiga nidaamka cadaaleedka ilaa dacwad dhageysiga uu dhammaanayo. Arrin kasta oo ku saabsan cabashada Gobolka ee aan ka mid ahayn dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka waa in lagu xalliyaa iyadoo la adeegsanayo waqtiga xaddidan iyo nidaamyada kor lagu sharraxay.

Haddii arin lagu soo jeediyo gudaha cabashada Gobolka taasoo horay loogu go'aamiyay cabashada nidaam cadaaladeedka oo ay ku lug leeyihiin isla dhinacyada (tusaale ahaan, adiga iyo dugsiga degmada), ka dib go'aanka dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka ayaa ku xirnaanaya arinkaas oo Wakaalada Waxbarashada Gobolkana waa in ay ku wargelisaa cabashoodaha in go'aanka laga dooday oo uuna kama danbeys yahay.

Cabashada ku eedeyneysa dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dadwayne inay ku guul darreysato inay hirgeliso go'aanka dhagaysiga nidaamka cadaaladeedka waa in ay xalliso Wakaalada Waxbarashada ee Gobolka.

***XAREYNTA CABASHADA GOBOLKA***
***34 CFR §300.153***

Urur ama qof ayaa xareysan kara cabasho Gobol oo qoran oona saxiixan iyadoo la raacayo habraacyada kor lagu sharraxay. Cabashada ka dhanka ah Gobolku waa inay ku jirtaa:
1. Bayaan sheegaya in dugsi degmadeedka ama wakaalado kale oo dadwayne ay ku xad gudbeen shuruuda Qaybta B ee IDEA ama xeerarkeeda dhaqangelinaya ee 34 CFR Qaybta 300;
2. Xaqiiqooyinka uu bayaanku ku saleysan yahay;
3. Saxiixa iyo macluumaadka lagala xidhiidhi karo kooxda cabashada xareysaneysa; iyo
4. Haddii xadgudubyada lagu eedaynayo ay ku saabsan yihiin ilmo gaar ah:
   (a) Magaca ilmaha iyo cinwaanka guriga uu deggan yahay ilmaha;
   (b) Magaca dugsiga uu ilmuhu dhigto;
   (c) Marka xaalku ku saabsan yahay ilmo ama dhalinyaro guri la'aan ah, waa in la helaa macluumaadka lagala xiriiri karo ilmaha, iyo magaca dugsiga uu ilmuhu dhigto;
   (d) Sharaxaad ku saabsan nooca dhibaatada heysata ilmaha, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xidhiidha dhibaatada; **iyo**
   (e) Xalinta loo soo jeediyay dhibaatada ilaa inta la og yahay oo ay heli karaan qolada xareysaneysa cabashada wakhtiga

cabashada la xareynayo.

Cabashadu waa in ay sheegto xadgudub dhacay wax aan ka badnayn hal sano ka hor taariikhda cabashada la helay sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Qaadashada Habraacyada Cabashada Gobolka.*** Kooxda xeraysaneysa cabashada Gobolka waa in ay u soo gudbisaa koobiga cabashada dugsiga degmada ama hay'adaha kale ee dawliga ah ee u adeegaya ubadka isla wakhtiga qoladu/kooxdu ka xareyneyso cabashada Wakaalada Waxbarashada Gobolka.

## ***HABRAACYADA CABASHADA NIDAAM CADAALADEEDKA***

***XAREYNTA CABASHADA NIDAAM CADAALADEEDKA***
***34 CFR §300.507***

**Guud ahaan**

Adiga ama dugsiga degmada ayaa xerayn kara dacwad nidaam cadaalad ah oo ka dhan arrin kasta oo la xidhiidha soo jeedin ama diidmada ku aadan in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaada, ama siinta hab ku habboon oo bilaash ah waxbarashada dadweynaha (FAPE) ilmahaada.

Cabashada habraaca cadaaladeed waa in ay sheegto eedeyn xadgudub ah oo dhacay wax aan ka badnayn laba sano ka hor inta adiga ama dugsiga degmadu aydan ogaan ama ay ahayd in aad ogaataan ficilka la sheegayo ee saldhiga u ah cabashada nidaamka cadaaladeed.

Jadwalka sare kuma quseeyo haddii aadan ku xarayn karin cabashada nidaam cadaaladeedka gudaha wakhtiga la cayimay sababtoo ah:

1. Dugsiga degmada ayaa si gaar ah oo khaldan u soo bandhigay in ay xalliyeen arrimaha lagu sheegay cabashada; ama
2. Dugsi degmada ayaa kaa reebtay xogta taas oo ka soo horjeeda sida looga baahnaa inay ku siiyaan sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

**Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta**

Dugsiga degmadu waa in ay kugu wargaliyaan adeeg kasta oo bilaash ah ama qiimo jaban ah iyo adeegyo kale oo khuseeya oo laga heli karo aagga haddii aad codsato macluumaadka, **ama** haddii adiga ama dugsiga degmada aad xeraysataan cabashada nidaam cadaaladeedka.

***CABASHADA NIDAAM CADAALADEEDKA***
***34 CFR §300.508***

**Guud ahaan**

Si aad u codsato dacwad dhageysi, adiga ama dugsiga degmada (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga degmada) waa inaad u gudbisaa ama uu u gudbiyaa cabashada nidaamka cadaaladeed qolada kale. Cabashadaasi waa inay ka kooban tahay dhammaan waxyaabaha hoos ku taxan waana inay ahaato mid sir ah.

Qof kasta oo soo xareysta cabashada waa inuu sidoo kale u keenaa Wakaaladda Waxbarashada Gobolka nuqulka ah cabashada.

**Nuxurka cabashada**

Cabashada nidaam cadaaladeedka waa in ay ku jiraan:

1. Magaca ilmaha;
2. Cinwaanka guriga ama meesha uu ilmahu degan yahay;
3. Magaca dugsiga ilmaha;
4. Haddii ilmuhu yahay ilmo ama dhalinyaro guri la'aan ah, bixi macluumaadka xiriirka ilmaha iyo magaca dugsiga ee ilmaha;
5. Sharaxaad ku saabsan nooca dhibaatada ilmaha ee la xiriirta tallaabada la soo jeediyay ama la diiday, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; **iyo**
6. Xallinta la soo jeediyay ee dhibaatada ilaa xadka la ogyahay oona diyaarka u ah kooxda cabaneysa (adiga ama dugsiga degmada) wakhtigaas.

**Ogeysiiska loogu baahan yahay ka hor dacwad dhageysiga cabashada nidaam cadaaladeedka**

Adiga ama dugsiga degmada waxaa laga yaabaa iniidan lahaanin dacwad dhagaysi ilaa adiga ama dugsiga degmadu (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga degmad) xeraysato ama ay xareystaan cabashada nidaam cadaaladeedka oo ayna ku jirto

macluumaadka kor lagu qoray.

**Filnaanshaha cabashada**

Si cabashada nidaamka cadaaladeed ay horay ugu socoto, waa in loo arkaa mid filnaan leh. Cabashada nidaam cadaaladeedka ayaa loo tixgalin doonaa mid filnaan leh (inay buuxisay shuruudaha kor ku xusan) haddii aysan ahayn in kooxda helaysa cabashada nidaam cadaaladeedka (adiga ama dugsiga degmada) ay qoraal ku ogeysiiyaan sarkaalka dacwad dhagaysiga iyo qolada kale, 15 maalmood gudahood kadib helitaanka cabashada, in qolyaha helaya ay aaminsan yihiin in cabashada nidaamka cadaaladeed aysan buuxin shuruudaha kor ku xusan.

Shan maalmo taariikh jadwaleed gudahooda marka la helo wargelinta ah in qolyaha helaya (adiga ama dugsiga degmada) ay u arkaan in aysan cabashada nidaam cadaaladeedka ahayn mid filnaansho leh, sarkaalka dacwad dhegaysigu qaadaya waa in uu go'aamiyo haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay buuxisay shuruudaha kor ku xusan, oo uuna ku ogaysiiyo adiga iyo dugsiga degmada qoraal ahaan isla markiiba.

**Wax ka beddelka cabashada**

Adiga ama dugsiga degmada waxaad samayn kartaan wax ka bedelka cabashada kaliya haddii:

1. Qolada kale ay ku ansixiyaan si qoraal ah oona la siiyo fursad ay ku xaliyaan cabashada nidaamka cadaaladeed iyada oo loo marayo kulan xalineed ah, taas oo lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Habka Xallinta***; **ama**
2. Wakhti aan ka danbeynin shan maalmood ka hor intaysan bilaabmin dhagaysiga nidaamka cadaaladeed, sarkaalka sameenaya dacwad dhegaysiga waxa uu fasaxayaa oggolaanshaha lagu sameenayo isbedelada.

Haddii kooxda cabaneysa (adiga ama dugsiga degmada) ay isbedel ku sameeyaan cabashada nidaam cadaaladeedka, waqtiyada kulanka xallinta (15 maalmood gudahooda marka la helo cabashada) iyo wakhtiga xallinta (30 maalmood gudahooda kadib helitaanka cabashada) dib u bilaabato taariikhda cabashada wax laga bedelay la xareeyay.

**Jawaab-celinta hay'adda waxbarashada ee maxalliga ah (Local educational agency, LEA) ama dugsiga degmada ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka**

Haddii dugsiga degmadu aanay kuu soo dirin ogaysiis hore oo qoraal ah, sida lagu qeexay ciwaanka ***Ogeysiiska Horay Loo Qoray***, ee ku saabsan mawduuca ku jira cabashadaada nidaamka cadaaladeed, dugsiga degmadu waa in, 10 maalmood gudahooda kadib helitaanka cabashada nidaam cadaaladeedka, ayaa kuu soo diraan jawaab ay ku jiraan:

1. Sharaxaada ku saabsan sababta dugsiga degmadu ay u soo jeediyeen ama u diideen inay qaadaan tallaabada lagu soo qaaday cabashada nidaamka cadaaladeed;
2. Sharaxaada ku saabsan xulashooyinka kale ee kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga (IEP) ay tixgeliyeen iyo sababaha doorashooyinkaas loo diiday;
3. Sharaxaada habraaca indho-indheyn, qiimayn, diiwaan, ama warbixin kasta oo uu dugsiga degmadu u isticmaalay si gundhig ugu ah tallaabada la soo jeediyay ama la diiday; iyo
4. Sharaxaada ku saabsan arrimaha kale ee khuseeya dugsiga degmada ee tallabada la soo jeediyay ama la diiday.

Bixinta macluumaadka ku jira shayada 1-4 ee sare kama hortagayso in dugsiga degmadu caddeeyaan in cabashada nidaam cadaaladeed aysan ahayn mid filnaansho leh.

**Jawaab-celinta qolada kale ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka**

Marka laga reebo sida lagu sheegay ciwaan-hoosaad sida ugu dhaw kor ah, **Jawaab-celinta hay'adda waxbarashada ee maxalliga ah (Local educational agency, LEA) ama dugsiga degmada ee ku aadan cabashada nidaam cadaaladeedka**, kooxda helaysa cabashada nidaam cadaaladeedka waa in, 10 maalmo taariikh jawaleed gudahooda laga bilaabo taariikhda helitaanka cabashada, u soo diraan dhinaca kale jawaab si gaar ah u qeexeysa arimaha kujiraan gudaha dacwada.

***FOOMAMKA MOODADA***
***34 CFR §300.509***

Wakaalada Waxbarashada Gobolka waa in ay soo saartaa foomamka moodada ah si ay kaaga caawiyaan xeraynta cabashada nidaamka cadaaladeed iyo in ay kugu caawiyaan adiga iyo qolooyinka kale si aad u xeraysataan cabashada Gobolka. Si kastaba ha ahaatee, Gobolkaaga ama dugsiga degmadaada lagama yaabo in ay kaaga baahdaan isticmaalka foomamkan moodada ah. Dhab ahaantii, waxaad isticmaali kartaa foomka moodada ah ama foom kale ah oo habboon, ilaa inta uu ka kooban yahay macluumaadka loo baahan yahay ee ku aadan xareynta cabashada nidaamka cadaaladeed ama cabashada Gobolka.

DHEXDHEXAADIN

***34 CFR §300.506***

**Guud ahaan**

Dugsiga degmada waa in ay curiyaan habraacyo ka dhigaya dhex dhexaadin mid la heli karo si ay ugu ogolaadaan adiga iyo dugsiga degmada si aad u xalisaan khilaafyada ku lug leh arin kasta oo hoos imaata Qaybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan arimaha soo ifbaxay ka hor xeraynta cabashada nidaam cadaaladeedka. Haddaba, dhexdhexaadintu waxay diyaar u tahay in lagu xalliyo khilaafaadka hoos imaada Qaybta B ee IDEA haddii aad gudbisay dacwad nidaam cadaalad ah iyo haddii kaleba si aad u codsato dacwad dhegaysiga nidaam cadaaladeed sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Xareynta Cabashada Nidaam Cadaaladeedka.***

**Waxyaabaha loo baahan yahay**

Habraacyadu waa inay xaqiijiyaan in habka dhexdhexaadinta yahay:

(1) Mid ikhtiyaari ka ah dhinacaaga iyo dhinaca dugsiga degmada;
(2) Mid aan loo isticmaalin in lagu diido ama lagu daahiyo xaqa aad u leedahay dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka, ama in lagu diido xuquuq kasta oo kale oo lagugu siiyay sida hoos imaata Qaybta B ee IDEA; iyo
(3) In uu qabtay dhexdhexaadiye aqoon leh oo aan eex lahayn kaas oo loo tababaray farsamooyin dhexdhexaadineed oo waxtar leh.

Degmada dugsi waxa laga yaabaa inuu curiyo habraacyo u soo bandhigaya waalidiinta iyo dugsiyada doorta inaanay isticmaalin habka dhexdhexaadinta, fursad aad kula kulanto, wakhti iyo goobta kugu haboon, cida aan danaynin:

1. Taas oo qandaraas kula jirta koox ku habboon xallinta khilaafaadka, ama xarunta tababarka waalidka iyo xarunta macluumaadka ama xarunta ilaha/xogta ee waalidka ee Gobolka; iyo
2. Taas oo sharxi lahayd faa'iidooyinka, oo ku dhiirigelin lahaa isticmaalka, habka dhexdhexaadinta adiga.

Gobolku waxay xajisaa liis ay ku qoran yihiin dad aqoon u leh oo dhexdhexaadiyayaal ah oo yaqaana sharciyada iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. Wakaalladda Waxbarashada Gobolka waa in ay u doorataa dhexdhexaadiyeyaasha si bakhtiyaa nasiib ah, wareegto ah, ama si kale oo aan eex lahayn.

Gobolka ayaa mas'uul ka ah kharashaadka lagu bixinaayo habka dhexdhexaadinta, oo ay ku jiraan kharashyada shirarka.

Kulan kasta oo ka mid ah habka dhexdhexaadinta waa in lagu qabtaa waqti ku habboon oona lagu qabtaa meel ku habboon adiga iyo dugsiga degmada.

Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad ku xalisaan khilaafka habka dhexdhexaadinta, labadiina dhinacba waa in aad gashaan heshiis sharci ah oo qeexaya xallinta oona:

1. Qeexaya in dhammaan wada-hadallada dhacay intii lagu jiray hannaanka dhexdhexaadinta ay ahaan doonaan kuwo sir ah oo aan loo isticmaali karin caddayn ahaan gudaha dacwad kasta oo xigta oo nidaam cadaaladeed ah ama dacwad madani ah(kiis maxkamadeed); oona
2. Ayna saxiixaan labadiinaba adiga iyo wakiilka dugsiga degmada kaasoo awood u leh inuu u gaaro go'aan kama danbeys ah asagoo/iyadoo metalaya dugsiga degmada.

Heshiis dhexdhexaadin oo qoran, saxiixan waa mid laga dhaqan gelin karo maxkamad kasta ee Dawlad goboleed oo awood u leh iney sidaas sameyso (maxkamad awood u leh sida uu dhigayo sharciga gobolka si ay u dhegeysato kiiskan nooacan ah) ama maxkamad degmadeed Maraykanka ah.

Wadahadalada dhacay intii lagu jiray habka dhexdhexaadinta waa inay ahaadaan kuwo qarsoodi ah. Looma isticmaali karo caddayn ahaan gudaha dacwad dhegaysi kasta oo mustaqbalka dhacda ama dacwad madani ah oo ka dhacda maxkamad federaali ah ama maxkamadda Gobolka ee dawlad-goboleedka u helaysa caawinaad sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

**Eex la'aanta dhexdhexaadiyaha**

Dhexdhexaadiyaha:

1. Ma noqon karo shaqaale ka tirsan Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada ee ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ubadkaaga;
2. Waa in aanu lahayn dano shaqsi ama mid xirfadeed taas oo ka hor imanaysa ujeeddada dhexdhexaadiyaha.

Qofka si kale ugu qalma dhexdhexaadiye maaha shaqaalaha dugsiga degmada ama Wakaalada Waxbarashada Gobolka oo keliya sababtoo ah isaga ama iyada waxaa kharash siinayo wakaalada ama dugsiga degmada si uu ugu ugu adeego dhexdhexaadiye ahaan.

***HABKA XALLINTA***
***34 CFR §300.510***
**Kulanka Xallinta**
Gudaha 15 maalmood markaad hesho ogaysiiska cabashadaada, iyo ka hor intaysan bilaabmin dhagaysiga dacwada, dugsiga degmada waa inay kula shiraan adiga iyo xubinta ay khusayso ama xubnaha Kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) kuwaas oo leh aqoon gaar ah oo ku saabsan xaqiiqooyinka lagu aqoonsaday cabashadaada nidaam cadaaladeedka. Shirka:

1. Waa in lagu daraa wakiilka dugsiga degmada kaas oo leh awooda go'aan samaynta isagoo matalaya dugsiga degmada; **oo**
2. Waxaana laga yaabaa in aan lagu darin qareenka dugsiga degmada haddii aysan ahayn inuu kula socdo qareen.

Adiga iyo dugsiga degmada ayaa go'aaminaya xubnaha ay khusayso ee kooxda IEP inay ka soo qaybgalaan kulanka.
Ujeedada shirku waa in aad ka hadasho cabashadaada nidaam cadaaladeedka, iyo xaqiiqooyinka aasaaska u ah cabashada, si dugsiga degmada ay u helaan fursad ay ku xaliyaan khilaafka.
Kulanka xalinta looma baahna haddii:

1. Adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiisaan qoraal ahaan inaad ka tanasushaan kulanka; **ama**
2. Adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiisaan inaad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta, sida lagu qeexay ciwaanka ***Dhexdhexaadinta.***

**Muddada xallinta**
Haddi dugsiga degmada ay xalin waayaan cabashada nidaamka cadaalada leh si aad ugu qanacdo 30 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo cabashada nidaam cadaaladeedka (inta lagu guda jiro mudada habka xalinta), dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka ayaa dhici kara.
Jadwalka 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee loogu talagaly in lagu soo saaro go'aanka kama dambaysta ah ee dacwada nidaam cadaaleedka, sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka Go'aamada Dacwad Dhageysiga, wuxuu bilaabmayaa dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, iyada oo laga reebo qaar ka mid ah hagaajinta lagu sameeyay muddada xallinta 30-maalin ee taariikh jadwaleedka, sida hoos lagu sharraxay.
Marka laga reebo halka adiga iyo dugsiga degmada aad labadiinuba ku heshiiseen inaad ka tanaasulaan nidaamka xallinta ama isticmaalka dhexdhexaadinta, guuldaradaada inaad ka qaybgasho kulanka xallinta waxay dib u dhigi doontaa waqtiyada habka xallinta iyo dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka ilaa kulanka laga qabto.
Haddii ka dib markii la sameeyo dadaallo macquul ah oona la diiwaangeliyo dadaalladaas, dugsiga degmada ma awoodaan inay helaan ka qaybgalkaaga ku aadan kulanka xallinta, dugsiga degmada ayaa laga yaabaa, dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, iney codsadaan in sarkaalka qabanaya dacwad dhegeysiga uu iska tuuro cabashadaada nidaam cadaaladeedka. Dukumeentiyeeynta dadaalladaas oo kale waa in ay ku jiraan diiwaanka dugsiga degmada ee ku aadan isku dayga ay ku diyaarinayaan wakhti iyo goob la isku raacsan yahay, sida:

1. Warbixino faahfaahsan ee wicitaanada taleefoonada ee la sameeyay ama la isku dayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas;
2. Koobiyada waraaqaha laguu soodiray adiga iyo jawaabaha lagaa helay; iyo
3. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan booqashooyinka gurigaaga ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii dugsiga degmada ay ku guuldareystaan inay ku qabtaan shirka xallinta 15 maalmood gudahooda laga bilaabo helitaanka ogaysiiska cabashadaada nidaamka cadaaladeed **ama** ay ku guuldareystaan inay ka qaybgalaan kulanka xallinta, waxaad weydiisan kartaa sarkaalka dacwad dhegeysiga inuu bilaabo wakhtiga 45-ka maalin ee taariikh jadwaleedka dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka.

**Wax ka yara beddelka ama hagaajinta muddada xallinta 30-maalmood ee taariikh jadwaleedka**
Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiisaan qoraal inaad ka tanaasushaan kulanka xallinta, intaa ka dib 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.
Bilaabashada dhexdhexaadinta kadib ama kulanka xallinta iyo ka hor dhamaadka 30-ka maalmood ee wakhtiga xallinta, haddii adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshishaan qoraal in aanu heshiis suurtogal ahayn, markaas 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka ee dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeed ayaa bilaabmaya maalinta xigta.
Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad isku waafaqdaan inaad adeegsataan nidaamka dhexdhexaadinta balse aydaan weli gaadhin heshiin, dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta habka dhexdhexaadinta waa la sii wadi karaa ilaa heshiis laga gaaro haddii labada dhinacba ay ku heshiiyaan sii wadista hab qoraal ahaan ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii

midkiin adiga ama dugsiga degmada aad ka baxdaan nidaamka dhexdhexaadinta inta lagu jiro muddadan sii socoshada, markaas 45-ka maalmood ee taariikh jadwaleedka dacwad dhageysiga nidaamka cadaaladeedka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

**Heshiis dejinta qoran**
Haddii xal laga gaadho khilaafka gudaha shirka xallinta, adiga iyo dugsiga degmada waa inaad gashaan heshiis sharci ah oo fulinaya kaas oo:

(1) Ay saxiixeen adiga iyo wakiilka dugsiga degmada kaasoo awood u leh inuu u gaaro go'aan kama danbeys ah asagoo/iyadoo metalaya dugsiga degmada; oona

(2) Laga dhaqan gelin karo maxkamad Goboleed kasta oo awood u leh (maxkamad Gobol oo awood u leh inay dhegeysato kiiskan) ama maxkamadda degmada ee Mareykanka ama Hay'adda Waxbarashada Gobolka, haddii Gobolkaagu leeyahay hab kale ama habraacyo u oggolaanaya dhinacyada inay raadsadaan dhaqan gelinta heshiisyada xallinta.

**Muddada dib u eegista heshiiska**
Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad heshiis gaadhaan sabab ka dhalatay natiijada kulanka xallinta awgiis, midkood labada dhinacba (adiga ama dugsiga degmada) waxa laga yaabaa in ay heshiiska ku buriyaan 3 maalmood oo shaqo gudahooda laga soo bilaabo wakhtiga adiga iyo dugsiga degmada labadiinaba aad saxiixdeen heshiiska.

## ***DACWAD DHEGEYSIGA CABASHOOYINKA NIDAAM CADAALADEEDKA***

***DACWAD DHEGEYSIGA NIDAAM CADAALEEDKA EEX LA'AANTA AH***
***34 CFR §300.511***

**Guud ahaan**
Mar kasta oo dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka la xareeyo, adiga ama dugsiga degmada ee ku lug leh khilaafka waa inaad haysataan fursad dacwad dhagaysi cadaalad ah oo eex la'aan ah, sida lagu qeexay qeybaha ***Cabashada Nidaam Cadaaleedka*** iyo ***Habka Xallinta.***

**Sarkaalka dacwad dhegeysiga ee eex La'aanta ah**
Ugu yaraan, sarkaalka dacwad dhegeysiga:

1. Waa inuusan noqon shaqaale ka tirsan Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada ee ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha. Si kastaba ha ahaatee, qofku maaha shaqaale ka tirsan wakaaladda oo keliya sababtoo ah isaga ama iyada waxaa kharashka siinaya wakaalada si uu ugu adeego ka ahaan sarkaal dacwad dhegeysi;
2. Waa in aanu lahayn dan shakhsi ama mid xirfadeed oo khilaafaya ujeeddada sarkaalka dacwad dhegaysiga ee dacwada;
3. Waa inuu ahaado mid aqoon leh oo fahma qodobada IDEA, xeerarka Federaalka iyo Gobolka ee khuseeya IDEA, iyo fasiraada sharciga ah ee IDEA ee Maxkamadaha Federaalka iyo Gobolka; **oo**
4. Waa in uu leeyahay aqoonta iyo kartida uu ku qabanayo dacwad dhageysiga, iyo in uu sameeyn karo oona uu qori karo go'aamo, waafaqsan ku-dhaqanka sharciga caadiga ah.

Dugsi kastoo degmadeed waa inuu xajiyaa/hayaa liiska dadka ugu shaqeeya sida saraakiisha dacwad dhegeysiga oo ay ku jiraan bayaan ku saabsan shahaadooyinka sarkaal kasta oo dacwad dhegeyste ah.

**Mawduuca dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka**
Kooxda (adiga ama dugsiga degmada) ee codsada dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka ayaa laga yaabaa in aanay ku soo qaadin arrimaha dacwad dhagaysiga nidaam cadaaleedka oo aan lagu soo hadal qaadin gudaha cabashada nidaam cadaaladeedka haddii aysan ka ahayn in qolada kale oggolaato.

**Wakhti jadwaleedka codsashada dacwad dhageysi**
Adiga ama dugsiga degmada waa in aad codsataan dacwad dhageysiga eex la'aanta ah oo ku saabsan cabashada nidaam cadaaleedka laba sano gudahooda laga bilaabo taariikhda adiga ama dugsiga degmada aad ogaateen ama ay ahayd inaad wax ka ogaataan arinta ku saabsan cabashada.

**Ka reebitaanada wakhti jadwaleedka**
Jadwalka sare kuma quseeyo haddii aadan xarayn karin cabashada nidaam cadaaladeedka sababtoo ah:
1. Dugsi degmadeedka ayaa si gaar ah u soo bandhigay si khaldan shegeena inay xalliyeen dhibkii ama arrinta aad ku soo bandhigtay cabashadaada; ama
2. Dugsi degmada ayaa kaa reebtay xogta taas oo ka soo horjeeda sida looga baahnaa inay ku siiyaan sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

***XUQUUQAHA DACWAD DHAGEYSIGA***
***34 CFR §300.512***
**Guud ahaan**
Waxa aad xaq u leedahay in aad isku matasho dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka (oo ay ku jirto dacwad dhageysiga la xiriirta hababka anshax-marinta) ama rafcaanka dacwad dhageysiga si aad u hesho cadeymo dheeraad ah, sida lagu qeexay hoosta cinwaan-hoosaadka, ***Racfaan ka qaadashada go'aamada; dib u eegis aan eexda lahayn.*** Intaa waxaa dheer, dhinac kasta oo ka qayb galaya dacwad dhageysiga wuxuu xaq u leeyahay:
1. In uu la socdo oo uuna la taliyo qareen iyo/ama dadka aqoon ama tababar gaar ah leh taasoo ku saabsan dhibaatooyinka carruurta naafada ah;
2. In uu ku matalo dacwad dhageysiga qareen;
3. Inuu soo bandhigo caddaynta oo uuna is hortaag sameeyo, su'aalo waydiiso, oo u baahnaadana imaanshaha markhaatiyada;
4. Inuu mamnuuco soo bandhigida wax cadeymo ah oo ku saabsan dacwad dhegeysiga ee aan loo sheegin kooxda kale ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor wakhtiga dacwad dhegeysiga;
5. Inuu helo qoraal, ama, iyadoo ah ikhtiyaarkaaga, si elegtaroonig ah, qoraal-ereyba-erey ah oo ku saabsan dacwad dhegeysiga; **iyo**
6. Inuu helo qoraal, ama, iyadoo ah ikhtiyaarkaaga, natiijooyinka elektarooniga ah ee ku saabsan xaqiiqada iyo go'aamada.

**Shaacinta dheeraadka ah ee macluumaadka**

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dacwad dhegeysiga nidaam cadaaleedka, adiga iyo dugsiga degmada waa in aad isu sheegtaan dhammaan qiimayntii la dhammaystiray taariikhdaas iyo talooyinka ku salaysan qiimaynaha aad adiga ama dugsiga degmada aad dooneysaan inaad ku isticmaashaan dacwad dhegeysiga.
Sarkaalka dacwad dhegeysiga ayaa laga yaabaa inuu ka hortago dhinac kasta oo ku guuldareysta inuu u hoggaansamo shuruudahan inuu soo bandhigo qiimeynta ama talada la xiriirta dacwad dhageysiga iyadoon oggolaansho laga helin dhinaca kale.

**Xuquuqda waalidka ee marka la joogo goobta dacwad dhageysiga**
Waa in lagu siiyo xaqa aad:
1. Uga yagleeleyso in ilmahaagu joogo goobta dacwad dhageysiga;
2. Ugu furi karto dacwad dhageysiga dadweynaha; **iyo**
3. Ugu heleyso diiwaanka dacwad dhageysiga, natiijooyinka ka soo baxa xaqiiq raadinta iyo go'aamada la soo sooro si bilaash ugu ah adiga.

***GO'AAMADA DACWAD DHAGEYSIGA***
***34 CFR §300.513***
**Go'aanka sarkaalka dacwad dhageysiga qaadaya**
Go'aanka sarkaalka dacwad dhegeysiga qaadaya ee ku saabsan haddii ilmahaagu helay waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo habboon (free appropriate public education, FAPE) waa in lagu saleeyaa caddaymaha iyo doodaha sida tooska ah ula xidhiidha FAPE.
Arrimaha lagu eedaynayo xadgudubka ka dhanka ah habraaca (sida "Koox IEP oo aan dhameystirneyn"), sarkaalka dacwad dhegaysiga ayaa laga yaabaa inuu ogaado in ilmahaagu aanu helin FAPE kaliya haddii ay xadgudbitaanada habraaceed:
1. Ay farageliyeen xaqa ubadkaagu u leeyahay waxbarashada guud ee ku haboon eena bilaashka ah (FAPE);
2. Si weyn u farageliyeen fursadaada aad kaga qayb qaadan lahayd habka go'aan gaarista ee ku saabsan siinta ilmahaaga waxbarasho ku haboon oo bilaash ah (FAPE); **ama**
3. Ay sababtay in ilmahaaga laga xayuubiyo faa'iidooyinka waxbarashada.

Midkoodna qodobbada kor lagu sheegay looma fasiri karo si looga hortago sarkaalka dhegeysiga inuu amro dugsiga

degmadu in uu u hoggaansamo shuruudaha qaybta ilaalinta habraaca ee qawaaniinta Federaalka ee hoos timaada Qeybta B ee IDEA (34 CFR
§§300.500 ilaa 300.536).

**Codsiga gooniga ah ee ku aadan dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka**
Ma jiraan wax ka mid ah qaybta ilaalinta habraaca ee qawaaniinta Federaalka ee hoos timaada Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536) si looga hortago in aad xeraysato cabashada ku aadan nidaam cadaaladeedka oo gooni ah kaas oo ku saabsan arrin ka duwan cabashada nidaam cadaaladeedka ee marka horeba aad xareeysay.

**Natiijooyinka iyo go'aanka loo soo bandhigaayo guddiga la-talinta iyo dadweynaha guud**
Wakaaladda Waxbarashadda Gobolka ama dugsiga degmada, (midkasta oo mas'uul ka ahaa dacwad dhegeysigaaga) ka dib markii la tirtiro wixii macluumaad shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo, waa in:
1. Ay bixisaa natiijooyinka iyo go'aamada dacwad dhageysiga nidaam cadaaleedka ama rafcaan u gudbisaa guddiga la-talinta waxbarashada gaarka ah ee Gobolka; **oo**
2. Ayna uga dhigtaa natiijooyinkaas iyo go'aamadaas mid ay heli karaan dadweynaha.

## ***RACFAANADA***

***DHAMAADKA GO'AANKA; RACFAANKA; DIB U EEGIS AAN EEXDA LAHAYN***
***34 CFR §300.514***
**Dhammaadka go'aanka dacwad dhegeysiga**
Go'aanka laga gaaro dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeedka (ay ku jirto dacwad dhageysiga laxiriira nidaamyada edbinta) waa kama dambeys, marka laga reebo in dhinac kasta oo ku lug leh dacwad dhageysiga (adiga ama dugsiga degmada) ayaa rafcaan ka qaadan karaan go'aanka iyagoo keenaya dacwad madani ah, sida lagu qeexay hoosta cinwaanka ***Tallaabooyinka Madaniga ah, Oo ay ku jiraan Muddada Wakhtiga Lagu Xareynayo Tallaabooyinkaas.***

***WAQTI JADWALEEDKA IYO HABBOONAANTA DACWAD DHAGEYSIGA IYO DIB U EEGITAANADA***
***34 CFR §300.515***
Wakaalada Waxbarashada Gobolka waa in ay xaqiijisaa in aan ka dambayn 45 maalmood ka dib marka uu dhaco 30-ka maalmood ee wakhtiga ee shirarka xalinta ama, sida lagu faahfaahiyay ciwaan-hoosaadka ***waxka bedelka muddada xallinta 30-maalmood ee taariikh jadwaleedka***, in aan ka danbeyn in ka badan 45 maalmood ka dib marka uu dhacayo muddada la habeeyay:
1. Lagu gaadho go'aan kama dambays ah dacwad dhegeysiga; iyo
2. In nuqul ka mid ah go'aanka loo diro mid kasta oo ka mid ah dhinacyada. Sarkaalka dacwad dhegeysiga ayaa laga yaabaa inuu bixiyo waqti kordhin gaar ah oo ka baxsan 45-ka maalmo taariikh jadwaleedka ee kor lagu sharraxay marka ay codsadaan labada dhinacba(adiga ama dugsiga degmada). Dacwad dhageysi kasta waa in lagu qabtaa waqti iyo goob macquul u ah adiga iyo ilmahaaga.

***TALLAABOOYINKA MADANIGA AH, OO AY KU JIRAAN WAKHTIGA LAGU XAREYNAYO TALLAABOOYINKAAS***
***34 CFR §300.516***
**Guud ahaan**
Dhinac kasta (adiga ama dugsiga degmada) ee aan ku raacsanayn natiijooyinka iyo go'aanka ka soo baxay dacwad dhagaysiga nidaamka cadaaladeed (oo ay ku jiraan dacwad dhagaysiga la xidhiidha habraacyada anshax-marinta) waxay xaq u leeyihiin inay keenaan dacwad madani ah oo ku saabsan arrinta dhacday. mawduuca dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka. Talaabada waxaa la geyn karaa maxkamada Gobolka ee awooda u leh (maxkamad gobol oo awood u leh inay dhageysato dacwada noocaan ah) ama maxkamada degmada ee Mareykanka iyadoon loo eegin cadadka lagu muransan yahay.

**Xaddidaata waqtiga**
Kooxda (adiga ama dusgiga degmada) ee keenaya falka/tallaabada waa in ay haystaan 42 maalmood oo taariikh jadwaleed ah laga bilaabo taariikhda uu soo baxay go'aanka sarkaalka dacwad dhagaysiga si uu u xareeyo dacwad madani ah.
IDAPA 08.02.03.109.05g

**Habraacyo dheeraad ah**
Tallaabo/fal kasta oo madani ah, maxkamaddu:

1. Waxeey heshaa diiwaanada dacwadaha maamulka;
2. Waxeey ku dhageysata caddaynta dheeraad ah codsigaaga ama codsiga dugsiga degmada ; **oo**
3. Waxayna ku salaysaa go'aankeeda u kala muhiimsanaanta caddaynta waxayna bixisaa nafiska/caawimada ay maxkamaddu go'aansato inay ku habboon tahay.

Sida hoos timaada duruufaha ku habboon, nafisinta garsoorka waxa ka mid ahaan kara dib u bixinta waxbarashada dugsiga gaarka ah iyo adeegyada waxbarashada magdhowga ee magdhawga ah.

**Awoodda sharciyeedka maxkamadaha degmada**
Maxkamadaha degmada ee Mareeykanka waxay awood u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan ficilada hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyadoon loo eegin cadadka lagu muransan yahay.

**Xeerka dhismaha**
Ma jiro wax ku jira Qaybta B ee IDEA oo xaddidaya ama xadeenaya xuquuqaha, nidaamyada, iyo xaq fulinta maxkamadda ee la heli karo sida hoos timaada Dastuurka Maraykanka, Sharciga Naafada Ameerikaanka ee 1990, Ciwaanka V ee Sharciga Dhaqancelinta ee 1973 (Qaybta 504), ama Shuruucda kale ee Federaalka ee ilaalinaya xuquuqda carruurta naafada ah, marka laga reebo ka hor inta aan la xarayn ficil madani ah oo hoos imanaya sharciyadan raadinta caawinaad/nafis taas oo sidoo kale laga heli karo sida hoos imaada Qaybta B ee IDEA, habraacyada nidaam cadaaleedka kor lagu sharaxay waa in loo isticmaalaa ilaa xad la mid ah sida looga baahan yahay haddii xisbigu xareeyo ficilka hoos imaada Qaybta B ee IDEA. Tani waxay ka dhigan tahay in laga yaabo inaad haysato xaq fulin maxkamadeed oo la heli karo marka loo eego sharciyo kale kuwaas oo la jaan qaadaya kuwa lagu heli karo sida hoos timaada IDEA, laakiin guud ahaan, si aad u hesho caawinaad/nafis xagga sharciyada kale waa inaad marka hore isticmaashaa xaq fulinta maxkamadeed ee maamul ee la heli karo ee hoos timaada IDEA (tusaale ahaan, cabashada nidaamka cadaaladeedka; habka xallinta oo ay ku jiraan kullanka xallinta; iyo habraacyada dacwad dhageysiga eex la'aanta ah) ka hor inta aadan si toos ah maxkamadda u aadin.

***MEELAYNTA ILMAHA IYADOO MARKAA CABASHADA IYO DACWAD DHAGEYSIGA NIDAAM CADAALADEEDKA LA SUGAYO***
***34 CFR §300.518***
Marka laga reebo sida lagu bixiyay hoos ee hoos timaada cinwaanka ***HABRAACYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH***, marka
cabashada nidaamka cadaaladeed loo diro qolada kale, inta lagu jiro wakhtiga habka xallinta, iyo inta la sugayo go'aanka dacwad dhegaysi kasta oo cadaaladeed oo aan eex lahayn ama dacwad maxkamadeed, haddiii aysan ahayn in adiga iyo gobolka ama dugsiga degmada aad ku heshiiseen si kale ma'ogiyee, ilmahaagu waa inuu ku sii jiraa meeleyntiisa ama meelaynteeda waxbarasho ee hadda.
Haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay ku lug leedahay codsiga qaabilaada hore ee dugsiga dawlada, ilmahaagu, iyadoona markaa adiga oggolaansho lagaa heysto, waa in lagu meeleeyaa barnaamijka caadiga ah ee dugsiga dadweynaha ilaa laga dhammeeyo dhammaan dacwadahaas.
Haddii cabashada nidaam cadaaladeedka ay ku lug leedahay codsiga adeegyada hore ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA ee ubadka ka gudbaya in lagu adeego sida hoos timaada Qeybta C ee IDEA una gudbaya Qeybta B ee IDEA uma dii qalmo adeegyada Qaybta C sababtoo ah ilmuhu wuu saddex jirsaday, dugsiga degmada loogama baahna inay bixiyaan adeegyada Qaybta C ee ubadku helayay. Haddii ilmaha la ogaado inuu u qalmo sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA oo aad bixisay oggolaanshah inuu ilmuhaagu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii ugu horeysay, ka dib, inta la sugayo natiijada dacwadda, dugsiga degmadu waa in uu siiyaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee aan lagu muransanayn (kuwa adiga iyo dugsiga degmada labadiinuba aad ku heshiisaan).
Haddi sarkaalka dhagaysiga ee qaadaya dacwada nidaam cadaaladeedka ee ay qabatay Wakaalada Waxbarashada Gobolka uu kugu raaco in bedelka meelayntu ay haboontahay, meelayntaas waa in loola dhaqmaa sidii meelaynta waxbarasho ee ubadkaagu hadda halkaas oo ilmahaagu ku sugnaan doono inta aad sugayso go'aanka dacwad dhageysi kastoo ah nidaam cadaaladeed eex la'aan ah ama dacwad maxkamadeed.

***KHIDMADAHA/KHARASHAADKA QAREENADA***
***34 CFR §300.517***

**Guud ahaan**

Tallaabo kasta ama dacwad kasta oo lagu keeno si hoos imaada Qaybta B ee IDEA, maxkamaddu, iyadoo ah ikhtiyaarkeeda go'aaneed, waxay ku abaal-marin karta kharashyada macquulkalga ah si qayb ka ah kharashyada adiga, haddii aad adkaato (guuleysato).

Tallaabo kasta ama dacwad kasta oo la keeno sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, maxkamada, iyadoo ah ikhtiyaarkeeda go'aaneed, waxay ku siin kartaa kharashaad qareeneed macquul ah taasoo qayb ka ah kharashaadka Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada, in lagu bixiya kharashka qareenkaagu, haddii qareenku: (a) xareeyay cabasho ama kiis maxkamadeed oo ay maxkamaddu u aragto mid aan caqli gal ahayn, aan macquul ahayn, ama aan aasaas lahayn; <u>**ama**</u> (b) sii wado dacwadda ka dib markii dacwadu ay si cad u noqotay wax aan macquul ahayn, ama aan sal lahayn; <u>**ama**</u>

Ficil kasta ama dacwad kasta oo la keeno sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, maxkamada, iyadoo ah go'aankeeda, waxay ku abaal marin kartaa kharash macquul ah qareenka taasoo qayb ka ah kharashaadka Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada, in la siiyo kharash adiga ama qareenkaaga, haddii codsigaaga dacwad dhageysiga nidaam cadaaladeed ama kiis dambe oo maxkamadeed lagu soo bandhigay ujeedo kasta oo aan habboonayn, sida in la dhibaateeyo, si loo sameeyo dib u dhac aan loo baahnayn, ama si aan loo baahnayn loo kordhiyo kharashka tallaabada ama dacwadda (dacwad dhageysiga).

**Abaalmarinta khidmadaha**

Maxkamaddu waxay ku abaalmarisaa kharashka/khidmada qareenka ee macquulka ah sida soo socota:

1. Khidmadaha waa in lagu saleeyaa sicirrada ka jira bulshada dhexdeeda taas oo ficilka ama dacwad dhageysiga ka soo baxay nooca iyo tayada adeegyada la bixiyay. Waxaa laga yaabaa in aan la isticmaalin wax gunno ah ama tire jibaare xisaabinta khidmadaha la bixiyo.
2. Khidmadaha qareenada ayaa laga yaabaa in la bixinin sidoo kalena dib loo soo celinin kharashaadka la xidhiidha tallaabo kasta ama habraac kasta oo hoos yimaada Qaybta B ee IDEA ee ku aadan adeegyada la qabtay ka dib markii heshiis fursad soo bandhigeed qoraal ah laguu sameeyo adiga haddii:
   (a) Fursad soo bandhigista lagu sameeyay wakhtiga lagu sheegay Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Habka Madaniga ah ama, xaalka sida dacwad dhageysi cadaaladeed ama dib u eegista heer Gobolka ah, wakhti kasta in ka badan 10 maalmo taariikh jadwaleed ka hor intaan dacwadu bilaabmin;
   (b) Fursad soo bandhigista laguma aqbalo 10 maalmood oo taariikh jadwaleed gudahood ah; <u>**oo**</u>
   (c) Sarkaalka dacwad dhageysiga ee maxkamadda ama maamulku uu ogaado in caawinaad/nafiska ugu dambeyntii aad heshay aysan ahayn mid adiga kuugu habboon marka loo eego heshiis soo bandhigista

   Iyadoo ay jiraan xayiraadahaas, abaal-marinta khidmadaha qareennada iyo kharashyada la xidhiidha ayaa laga yaabaa in laguu sameeyo haddii aad adkaato oo aadna si cad ugu caddaysid diidmo heshiis soo bandhigista.
   Khidmada ayaa laga yaabaa in lagu bixinin kulan kasta oo ay yeeshaan kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) haddii aysan ahayn in kulanka la qabtay sabab ah dacwad maamuleed ama talaabo maxkamadeed.
3. Khidmada sidoo kale waxaa laga yaabaa in lagu bixinin dhexdhexaadinta sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Dhexdhexaadinta.***
   Kulanka xallinta, sida lagu qeexay ciwaanka ***Habka Xallinta***, looma tixgalinayo shir la isugu yeero sabab ah dacwad dhageysi maamul ama tallaabo maxkamadeed awgeed, sidoo kale looma tixgeliyo dacwad dhageysiga maamul ama tallaabo maxkamadeed ujeeddooyinka qodobbada khidmadaha qareennada.

Maxkamaddu waxay yaraynaysaa, sida ku habboon, qaddarka khidmadaha qareennada ee lagu bixiyo Qaybta B ee IDEA, haddii ay maxkamaddu ogaato in:

1. Adiga, ama qareenkaada, inta ay socoto hawsha ama dacwada, si aan macquul ahayn u daahisay xalinta kama dambaysta ah ee khilaafka;
2. Qadarka khidmadaha qareennada haddii kale loo oggolaaday in lagu bixiyo si aan macquul ahayn uu ka badan qiimaha saacaddiiba ee ka dhex jira bulshada adeegyada la midka ah ee qareennada leh xirfad, sumcad, iyo waayo-aragnimo macquul ah;
3. Wakhtiga lagu bixiyay iyo adeegyada sharciga ah ee la bixiyay ahaayeen kuwo xad dhaaf ah marka loo eego nooca falka ama dacwadda; <u>**ama**</u>
4. Qareenka ku matalaya ma uusan ku siin dugsiga degmada macluumaadka ku haboon gudaha ogaysiiska

codsiga nidaamka cadaaladeed ee sida lagu qeexay ciwaanka ***Cabashada Nidaam Cadaaladeedka.***
Si kastaba ha ahaatee, maxkamaddu ma dhimi karto khidmadaha haddii maxkamaddu ay ogaato in Gobolka ama dugsiga degmada ay si aan macquul ahayn u daahiyeen xallinta kama dambaysta ah ee tallaabada ama dacwadda ama ay jirto xadgudub sida hoos imaanaya xeerarka ilaalinta nidaamka Qaybta B ee IDEA.

## ***<u>HABRAACYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH</u>***

***MAAMULKA SHAQAALAHA EE DUGSIGA***
***34 CFR §300.530***

**U go'aaminta kiis-ba-kiis**

Shaqaalaha dugsigu waxay u eegi karaan xaalad kasta oo gaar ah kiis-kiis, marka la go'aaminayo in beddelka meelaynta, ee lagu sameeyay shuruudaha soo socda ee la xidhiidha anshaxa, ay ku habboon tahay ilmo naafo ah oo ku xadgudba xeerka dugsiga dhaqan.

**Guud ahaan**

Ilaa xadka ay sidoo kale u qaadaan tallaabadan oo kale carruurta aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsigu, wax aan ka badnayn **10 maalmo dugsiyeed** oo isku xigta, waxay ka saari karaan ilmaha naafada ah kaas oo ku xad-gudba xeerka anshaxa ardayga meelayntiisa ama meelaynteeda hadda oona ku meeleyn karaan goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah, goob kale, ama laali karaan. Shaqaalaha dugsigu waxa kale oo laga yaabaa inay ku soo rogaan ka saaritaano dheeraad ah ilmaha wax aan ka badnayn **10 maalmo dugsiyeed** oo isku xigta isla sannad dugsiyeedkaas dhacdooyinka kala duwan ee anshax-xumada, waa haddii ka saaritaanadaasi aanay ka dhigneyn beddel ku sameynta meelaynta (eeg cinwaanka ***Bedelka Meelaynta Sabab ah Ka saaritaanada la xidhiidha Anshaxa*** ee qeexida).

Marka ilmaha naafada ah laga saaro meelaynta uu hadda ku jiro ee wadarta 10 maalmood oo dugsiyeed isku mid ah sannad dugsiyeedka, dugsiga degmada waa in, maalmaha xiga ee ka saarida sannad dugsiyeedkaas, ay bixiyaan adeegyo inta loo baahan yahay hoos ee hoos timaada cinwaan-hoosaadka Adeegyada.

**Awood maamuleedka dheeraad ah**

Haddii akhlaaqda ku xad-gudbay xeerka anshaxa ardaygu aanu ahayn mid muujinaya curyaannimada ubadka (ka eeg ciwaan-hoosaadka Go'aaminta muujinta) iyo beddelka edbinta meelaynta ay ka badan tahay 10 maalmood oo dugsiyeed oo isku xigta, shaqaalaha dugsigu waxay ku dabaqi karaan nidaamka edbinta ilmahaas naafada ah si la mid ah iyo isla muddada ay siinayso carruurta aan naafada ahayn, marka laga reebo in dugsigu uu siiyo adeegyada ubadkaas sida lagu sharxay hoosta ***Adeegyada***. Kooxda IEP ee ilmaha ayaa go'aamisa goobta waxbarasho ee ku meel gaadhka ah ee adeegyadaas camal.

**Adeegyada**

Degmadu ma siiso adeegyo ilmo naafo ah ama ilmo aan naafo ahayn kaas oo laga soo saaray meelayntiisa/teeda ee uu hadda ku jiro/jirto ***10 maalmo dugsiyeed ama wax ka yar*** gudaha sannad dugsiyeedkaas.

Ilmaha naafada ah ee laga soo saaray meeleynta uu hadda ilmuhu ku jiray ***in ka badan 10 maalmo dugsiyeed*** oo uusan dhaqankuna ahayn muujinta naafonimada ubadka (eeg ciwaan-hoosaadka, Go'aaminta muujinta) ama ilmo lagu soo saaray duruufo gaar ah (eeg ciwaan-hoosaadka, Duruufaha gaarka ah) waa inuu:

1. Sii wadaa inuu sii helo adeegyada waxbarashada (heli karaa waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon), si ay awood ugu siiso ubadka in uu sii wado ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada guud, in kasta oo uu joogo goob waxbarasho oo kale (taas oo noqon kartaa goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah) iyo in uu horumar ka gaadho ujeedooyinka lagu dejiyay IEP-ga ubadka; **<u>oona</u>**
2. Helaa, sida ku habboon, qiimaynta hab-dhaqanka shaqaynaysa, iyo adeegyada faragelinta habdhaqaneed iyo wax ka beddelitaanada, kuwaas oo loo qorsheeyay in lagu wajaho ku xad-gudubka habdhaqanka si aanay mar kale u dhicin.

Ka dib marka ilmaha naafada ah laga saaro meelaynta uu hadda ku jiro **10 maalmo dugsiyeed** isla sannad dugsiyeedkaas, iyo **<u>haddii</u>** ka saarida hadda ay tahay **10 maalmo dugsiyeed** oo isku xigta ama in ka yar **<u>iyo</u>** haddii ka saarista aysan ahayn beddelka meelaynta (hoos ka eeg qeexida), **<u>markaas</u>** shaqaalaha dugsiga, iyagoo la tashanaya ugu yaraan mid ka mid ah macalimiinta ilmaha, waxay go'aamiyaan ilaa xadka adeegyada loo baahan yahay si ilmuhu u sii wado ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada guud, inkastoo uu ku qaadan doono goob kale, iyo si uu horusocod uga sameeyo hadafyada lagu dejiyay IEP-ga ubadka.

Haddii ka saarista ay tahay beddelka meelaynta (eeg cinwanka, ***Beddelida Meelaynta*** Sabab ah Ka saaritaano Anshaxeed Awgood), Kooxda IEP ee ilmaha ayaa go'aamisa adeegyada ku habboon si ay ugu suurtageliso ubadku inuu sii wato ka qaybgalka manhajka waxbarashada guud, in kastoo uu ku heli doono goob kale (taasi ay noqon karto goob waxbarasho oo

ku meel gaadh ah), iyo in la horumariyo si loo gaadho yoolalka lagu dejiyay IEP-ga ubadka.

**Go'aaminta muujinta**

Gudaha **10 maalmo dugsiyeed** laga bilaabo go'aan kasta oo lagu bedelayo meelaynta ilmaha naafada ah sabab ah ku xadgudubka xeerka anshaxa ardayga awgeed (marka laga reebo ka saarida **10 maalmo dugsiyeed** oo isku xigta ama in ka yar oo aansan ahayn bedelida meelaynta) , dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee ay khusayso ee Kooxda IEP (sida aad go'aamiseen adiga iyo dusgiga degmada) waa in ay dib u eegaan dhammaan macluumaadka khuseeya faylka ardayga, oo ay ku jiraan IEP-ga ubadka, indha-indheyn kasta oo dhinaca macalinka ka socota , iyo macluumaad kasta oo khuseeya oo aad siisay adiga si aad u go'aamiso:

1. Haddii anshaxa su'aasha ka taagan tahay uu sababay, ama xiriir toos ah oo la taaban karo la lahaa, curyaannimada ubadka; **ama**
2. Haddii anshaxa su'aashu ay su'aasha ka taagan tahay uu ahaa natiijada tooska ah ee ka dhalatay ku guul dareysiga dugsiga degmada ee ku aadan fulinta IEP-ga ee ilmaha.

Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee ay khusayso ee kooxda IEP ubadku go'aansataan in mid ka mid ah shuruudahaas la buuxiyey, anshaxa waa in la go'aamiyaa inuu yahay muujinta naafanimada ubadka.
Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee ay khusayso ee kooxda IEP ubadku go'aansataan in habdhaqanka laga hadlayaa uu yahay natiijada tooska ah ee ka dhalatay ku guul dareysiga dugsiga degmada ee ku aadan fulinta IEP-ga, dugsiga degmada waa inay qaadaan tallaabo degdeg ah oo lagu xallinayo cilladahaas.

**Go'aaminta in habdhaqankaasi ahaa muujinta naafada ee ilmaha**

Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee ay khusayso ee Kooxda IEP aad go'aansataan in dhaqanku ahaa muujinta naafonimada ee ilmaha, Kooxda IEP waa inay midkood:

1. Sameeyaan qiimaynta hab-dhaqaneed oo shaqaynaysa, haddii aysan ka ahayn in dugsiga degmada ay sameeyeen qiimayn dhaqaneed ka hor inta aanu dhaqankii ka dhashay beddelka meelaynta dhicin, oo ay u fuliyaan qorshaha faragelinta hab-dhaqanka ee ilmaha; **ama**
2. Haddii qorshaha faragelinta hab-dhaqanka mar hore la curiyay, dib u eeg qorshaha faragelinta dhaqanka, oo wax ka beddel, sida loogu baahdo, si wax looga qabto dhaqanka.

Marka laga reebo sida lagu sharaxay hoosta ciwaanka-hoosaadka ***Duruufaha gaarka ah***, dugsiga degmada waa in ay ku celiyaan ubadkaaga meeleyntii ubadkaaga laga soo saaray, haddii aysan ahayn in adiga iyo dugsiga degmadu aad ku heshiisaan beddelka meelaynta iyada oo qayb ka ah wax ka beddelka qorshaha faragelinta hab-dhaqanka.

**Duruufaha gaarka ah**

Haddi anshaxa uu ahaa mid muujinaayay naafonimada ubadkaaga iyo haddii kaleba, shaqaalaha dugsigu wey saari karaan ardayga oona ku meeleyn karaan goob waxbarashadeed kale oo ku meel gaadh ah (oo ay go'aamiyeen kooxda IEP-ga ee ilmaha) in aan ka badneyn 45 maalmo dugsiyeed, haddii ilmuhaagu:

1. Uu u soo qaato hub (ka eeg qeexida hoos) dugsiga ama ku haysta hub dugsiga dhexdiisa, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawl dugsiyeedka hoos yimaada awoodda Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsi degmadeedka;
2. Isagoo og inuu haysto ama isticmaalo daroogo sharci darro ah (ka eeg qeexida hoos), ama iibiya ama dalbado iibinta walaxda la xakameeyey, (ka eeg qeexida hoos), markaad dugsiga joogto, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawlaha dugsiga ee hoos yimaada xukunka Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada; **ama**
3. Uu u geystay dhaawac halis ah oo jireed (ka eeg qeexida hoos) qof kale inta uu joogo dugsiga, dhismaha dugsiga, ama gudaha hawl dugsi oo hoos timaada awoodda Wakaalada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada.

**Qeexitaannada**
***Walaxda la kantaroolo*** macnaheedu waa daroogo ama walax kale oo lagu aqoonsaday jadwalka I, II, III, IV, ama V ee qaybta 202(c) ee Sharciga Walxaha La kantaroolo (21 U.S.C. 812(c)).
***Daroogada sharci darrada ah*** macnaheedu waa walax la xakameeyo; laakiin kuma jiraan walaxda la kontoroolo ee si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo kormeerka xirfadle daryeel-caafimaad oo shati u haysta ama si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo awood kasta oo kale oo hoos timaada Xeerkaas ama si hoos imaada qodob kastoo kale sharciga Federaalka ah.
***Dhaawac jireed halis ah*** waxa uu leeyahay macnaha la siiyay ereyga "dhaawac jidheed daran" sida hoos timaada cutubka (3) ee farqada (h) ee qaybta 1365 ee ciwaanka 18, Xeerka Maraykanka.
***Hub*** wuxuu leeyahay macnaha la siiyay ereyga "hubka khatarta ah" ee hoos yimaada cutubka (2) ee farqada koowaad (g) ee qaybta 930 ee ciwaanka 18, Xeerka Maraykanka.

**Wargelinta**
Maalinta ay gaadho go'aanka ka saarista taas oo ah beddelka meelaynta ubadkaaga sabab ah ku xadgudubka xeerka anshaxa ee ardayga awgiis, dugsiga degmada waa in uu ku soo ogeysiiyaa adiga go'aankaas, oo uuna ku siiyaa adiga ogaysiis ku saabsan ilaalinta habraaca.

***BEDDELIDA MEELAYNTA SABAB AH KA SAARITAANADA ANSHAXEED AWGOOD***
***34 CFR §300.536***
Ka saarida ilmahaaga naafada ah meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga uu hadda kujiro waa beddelka meelaynta haddii:
1. Ka saaridu ay ka badan tahay 10 maalmo dugsi oo xiriir ah; **ama**
2. Ilmahaagu uu la kulmay ka saaritaano xiriir ah oo ka dhigan qaab sababtoo ah:
   (a) Taxanaha ka saarista ay wadar ahaan ka badan yihiin 10 maalmo dugsiyeed gudaha sanad dugsiyeedka;
   (b) Habdhaqanka ubadkaaga waxa uu si la mid ah ula mid yahay hab-dhaqanka ubadka ee dhacdooyinkii hore ee sababay ka saaritaanda isdaba joog ah; **oo**
   (c) Qodobbadaas dheeraadka ah sida dhererka muddo saarida kasta, wadarta wakhtiga ilmahaaga la saaray, iyo isku dhawaanshaha ka saaritaanda ee midba midka kale.

Haddi qaabka ka saaristu uu yahay bedelka meelaynta oo uu ku go'aamiyay xaalad- kiisba-kiis dugsiga degmada iyo, haddii laga horyimaado, uu ku xiran tahay dib u eegis iyada oo loo marayo nidaamka cadaalada iyo dacwadaha garsoorka.

***GO'AAMINTA GOOBTA***
***34 CFR §300.531***
Kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ayaa go'aamineysa goobta waxbarasho ee ku meel gaadhka ah ee ka saaritaanada kuwaas oo ah ***beddelitaanada meelaynta***, iyo ka saaritaanda hoos imaada ciwaan-hoosaadyada ***Awood maamuleedka dheeraadka ah*** iyo ***Daruufaha gaarka ah***.

***APPEAL34 CFR §300.532***
**Guud ahaan**
Waxaa xareysan kartaa cabashada nidaam cadaaladeedka(eeg ciwaanka ***Habraacyada Cabashada Nidaam Cadaaladeedka***) si aad u codsato dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka hadii aadan ku raacsanayn:
1. Go'aan kasta oo ku saabsan meelaynta lagu sameeyay sida hoos imaada qodobadan anshaxa; **ama**
2. Go'aaminta muujinta ee kor lagu sharaxay.

Dugsiga degmada waxa laga yaabaa inay xereeystaan cabashada nidaam cadaaladeedka (eeg kor) si ay u codsadaan dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka haddi ay aamminsan yihiin sii wadista meelaynta ubadkaaga inay si wayn dhaawac ugu keeneyso ilmahaaga ama ilmaha kale.

**Awooda sarkaalka qaadaya dacwad dhageysiga**

Sarkaalka dacwad dhageysiga ee buuxiya shuruudaha lagu qeexay ciwaan-hoosaadka ***Sarkaalka Dacwad Dhageysiga ee Eex La'aanta*** ah waa in uu qabtaa nidaam cadaaladeedka oo uuna go'aan gaaraa. Sarkaalka dacwad dhegeysiga waxaa laga yaabaa in:

1. Uu ku soo celiyo ilmahaaga naafada ah meelaynta laga soo saaray ilmahaaga, haddii sarkaalka dacwad dhegaysigu uu go'aamiyo in ka saarista ay xadgudub ku tahay shuruudaha lagu qeexay cinwaanka ***Awood Maamule ee Shaqaalaha Dugsiga***, ama in hab-dhaqanka ilmuhaagu uu ahaa muujinta naafada ilmahaaga; **ama**
2. Uu amro u beddelka meelaynta ubadkaaga naafada ah goob waxbarasho oo ku meel gaadh ah muddo aan ka badnayn 45 maalmo dugsiyeed haddii sarkaalka dacwad dhegaysigu go'aamiyo in sii wadista meelaynta ubadkaagu ay aad ugu dhowdahay inay ku keento dhaawac ilmahaaga ama ilmaha kale.

Nidaamyadan dacwad dhegeysiga waa la soo celin karaa, haddii dugsiga degmadu ay aaminsan yihiin in ku soo celinta ubadkaaga meeshii asalka ahayd ay aad ugu dhowdahay inay ku keento dhaawac ilmahaaga ama ilmaha kale.

Mar kasta oo adiga ama dugsiga degmadu xareeysataan cabashada nidaam cadaaladeedka si aad u codsataan dacwad dhageysi degdeg ah, waa in la qabtaa dacwad dhageysi buuxiya shuruudaha lagu qeexay ciwaanada ***Habraacyada Cabashada Nidaam Cadaaleedka, Dacwad Dhegeysiyada Cabashooyinka Nidaam Cadaaladeedka***, marka laga reebo kuwa soo socda:

1. Wakaalladda Waxbarashada Gobolku ama dugsiga degmadu waa in ay diyaariyaan dacwad dhageysi ah nidaam cadaaladeed oo la dedejiyey, taas oo ay tahay iney dhacdo **20** maalmo dugsiyeed gudahood laga bilaabo taariikhda dacwad dhegeysiga la codsado waana in ay keento go'aan **10** maalmo dugsiyeedka gudahooda ka dib dacwad dhegeysiga.
2. Haddiii aysan ka ahayn in adiga iyo dugsiga degmadu ay ku heshiiyaan qoraal inay ka tanaasulaan kulanka, ama ay ku heshiiyaan inay isticmaalaan dhexdhexaadin, kulan xalineedku waa inuu dhacaa gudaha **todoba** maalmo taariikh jadwaleed kadib marka la helo ogaysiiska cabashada nidaamka cadaaladeedka. Dacwad dhagaysigu wuu sii socon karaa haddii aan arrinta lagu xalin si ay labada dhinacba ku qancaan **15** maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo cabashada nidaamka cadaaladeed.
3. Gobolku waxa uu u samayn karaa xeerar kala duwan dacwad dhageysiyada nidaam cadaaleedka la soo dedejiyay marka loo eego kuwii ay u dejisay dacwad dhageysiyada nidaam cadaaleedka ee kale, laakiin marka laga reebo wakhtiyada jaango'an, xeerarkaasi waa in ay waafaqsan yihiin xeerarka ku jira dukumeentigan ee khuseeya dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka.

Adiga ama dugsiga degmada waxaad racfaan ka qaadan kartaan go'aanka dacwad dhagaysiga nidaam cadaaladeedka la dedejiyay si la mid ah go'aamada dacwadaha kale ee nidaam cadaaladeedyada ah (eeg ciwaanka ***Racfaanka***).

### *MEELEYNTA INTA LAGU JIRO RACFAANADA*
### *34 CFR §300.533*

Marka, sida kor lagu sharaxay, adiga ama dugsiga degmada aad xareeysataan cabashada nidaam cadaaladeedka taasoo la xidhiidha arrimaha anshax-marinta, ilmahaagu waa in (haddii aysan ahayn in adiga iyo Wakaallada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmadu aad ku heshiisaan si kale ma'ogiyee) uu ku sugnaadaa goobta waxbarashada ee beddelka ah ee ku meel gaadhka ah iyadoo laga sugayo go'aanka sarkaalka dacwad dhegeysiga, ama ilaa uu ka dhacaayo muddada saaritaanka sida lagu sheegay laguna qeexay cinwaanka Awood Maamuleedka Shaqaalaha Dugsiga, mid kasta oo dhaca marka hore.

### *ILAALINADA LOOGU TALAGALAY CARRUURTA AAN WALI U QALMIN WAXBARASHADA GAARKA AH IYO ADEEGYADA LA XIDHIIDHA*
### *34 CFR §300.534*

**Guud ahaan**

Haddii ilmahaaga aan la go'aamin in uu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo uuna ku xad-gudbo xeerka anshaxa ardayga, laakiin dugsiga degmadu uu aqoon u lahaa (sida hoos lagu go'aamiyay) ka hor intaysan dhicin hab-dhaqanka keenay falka anshax-marinta, in ilmahaagu ahaa ilmo naafo qabo, markaas cunugaada waxaa laga yaabaa inuu cadeeyo mid ka mid ah ilaalinada lagu qeexay gudaha ogeysiiskan.

**Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha anshax-marinta**

Dugsi degmada ayaa loo arki doonaa in ay ogyihiin in ilmuhaagu yahay ilmo naafo ah haddii, ka hor inta aanay dhicin dhaqankii keenay falka anshax-marinta:

1. Aad walaac aad qoraal ku muujisay u gudbisay maamulka ama shaqaalaha maamulka ee wakaalada waxbarashada ku haboon, ama macalinka ilmahaaga in ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha;
2. Aad codsatay qiimayn la xidhiidha u-qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoos yimaada Qaybta B ee IDEA; **ama**
3. Macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha kale ee dugsiga degmada ay muujiyaan walaac gaar ah oo ku saabsan qaabka akhlaaqda ee ubadkaagu si toos ah ugu muujiyay agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga degmadaada ama shaqaalaha kale ee kormeerka ee dugsiga degmada.

**Ka reebitaanka**

Dugsiga degmada looma qaadan doono in uu aqoon noocaas ah leeyahay haddii:

1. Aadan oggolaanin qiimeynta ilmahaaga ama diiday adeegyada waxbarashada gaarka ah; **ama**
2. Ilmahaaga la qiimeeyay oo la go'aamiyay inaanu noqon ilmo naafo ah sida hoos timaada Qaybta B ee IDEA.

**Shuruudaha khuseeya haddii aanay jirin wax gundhig aqooneed ah**

Haddii ka hor inta aan la qaadin tillaabooyinka anshax-marinta ee ilmahaaga, dugsiga degmadu aanay aqoon u lahayn in ilmuhaagu yahay ilmo naafo ah, sida kor lagu sheegay ee hoos timaada ciwaan-hoosaadyada ***Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha anshax-marinta*** iyo ***Ka reebitaanka*, ** ilmahaaga waxaa lagu soo rogi karaa tallaabooyinka anshax-marinta ee lagu dabaqo carruurta aan naafada ahayn ee ku kaco dhaqamo u dhigma.

Si kastaba ha ahaatee, haddii la codsado qiimaynta ilmahaaga inta lagu jiro muddada ilmahaaga lagu soo rogay tallaabooyinka anshax marinta, qiimaynta waa in loo sameeyaa si la soo dedejiyay.

Ilaa qiimaynta la dhammeeyo, ilmahaaga waxa uu ku sii jirayaa meelaynta waxbarasho ee ay go'aamiyeen maamulka dugsiga, taas oo ay ku jirto ka joojinta ama ka cayrinta aan lahayn adeegyada waxbarashada.

Haddii ilmahaaga loo go'aamiyo inuu yahay ilmo naafo qaba, iyadoo la tixgalinayo macluumaadka qiimaynta ay sameeyeen dugsiga degmada, iyo macluumaadka aad adigu bixisay, dugsiga degmadu waa inay siiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha iyadoo la raacayo Qaybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan shuruudaha anshax-marinta ee kor lagu sharaxay.

***U-GUDBINTA IYO TALAABADA AY QAADAYAAN SHARCI-FULINTA IYO MASUULIYIINTA GARSOORKA***
***34 CFR §300.535***

Qaybta B ee IDEA kama:

1. Mamnuuceyso wakaalad in ay uga warbixiso dambi uu galay ilmo naafo ah masuuliyiinta ku haboon; **ama**
2. Hortageyso sharci fulinta gobolka iyo mas'uuliyiinta garsoorka inay gutaan waajibaadkooda ku aaddan ku-dhaqanka sharciga federaalka iyo gobolka ee ku aadan dambiyada uu galo cunug naafo ah.

**Gudbinta diiwaanada**

Haddii dugsiga degmada ay ka warbixiyaan dembi uu galay ilmo naafo, dugsiga degmada:

1. Waa in uu xaqiijiyaa in koobiyada waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshax-marinta la soo gudbiyaa si ay u tixgaliyaan mas'uuliyiinta ay wakaaladu wargeliso dambiga; **iyo**
2. In laga yaabo in ay u gudbiso koobiyada waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshax-marinta kaliya ilaa inta uu ogolyahay Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinimada (FERPA)

## ***SHURUUDAHA KU MEELAYNTA HALKA DHINAC AH EE WAALIDIINTA CARUURTA EE DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY IYADOO LA ISTICMAALAYO KHARASHKA DAWLADA***

***GUUD AHAAN***
***34 CFR §300.148***
Qaybta B ee IDEA ugama baahna dugsiga degmada si ay u bixiyaan kharashka waxbarashada, oo ay ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, ee ilmahaada naafada ah ee dhigta dugsiga gaarka loo leeyahay ama xarun haddii dugsiga degmada uga dhigeen waxbarashada dadweynaha ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid uu heli karo ilmahaaga adiguna aad doorato inaad ilmaha ku meeleyso dugsi ama xarun si gaar ah loo leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, degmada dugsiga ee uu ku yaalo dugsiga sida gaarka ah loo leeyahay waa in uu ku daraa ubadkaaga gudaha ardeyda kuwaas oo baahiyahooda lagu qeexay Qaybta B ee khuseeysa carruurta ay waalidkood ku meeleeyeen dugsiga gaarka loo leeyahay sida hoos timaada 34 CFR §§300.131 ilaa 300.144.

**Lacag celinta meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahay**
Haddii ilmahaagu hore u helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoos yimaada maamulka dugsiga degmada, oo aad dooratid inaad ilmahaaga ku diwaangeliso dugsi hoose ama dugsi sare oo gaar loo leeyahay adoona oggolaansho ka helin ama u gudbin dugsiga degmada, maxkamada ama sarkaal dacwad dhageyste ah ayaa laga yaabaa inuu uga baahdo wakaaladu inay kuu soo celiso qarashka ku baxay diiwaan gelintaas haddii maxkamada ama sarkaalka dacwad dhageysigu ogaato/ogaado in wakaaladu aysan uga dhigin waxbarshada guud ee ku haboon ee bilaashka ah (FAPE) mid uu heli karo ilmahaaga waqti ku habboon ka hor diiwaangelintaas, iyo in meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahay ay habboon tahay. Sarkaalka dacwad dhageysiga ama maxkamada ayaa laga yaabaa inay u arkaan meeleyntaada mid haboon, xitaa haddii meeleyntu aysan gaarsiisneyn heerarka Gobolka ee khuseeya waxbarashada ay bixiso Wakaalada Waxbarashada Gobolka iyo dugsiyada degmooyinka.

**Xaddidaadda ku aadan lacag-celinta**
Kharashka lacag-celinta ee lagu sharaxay cutubka sare ayaa laga yaabaa in la dhimo ama la diido:

1. Haddii: (a) Shirkii ugu dambeeyay ee barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ee aad ka qaybgashay ka hor intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dawlada, aadan ogaysiin Kooxda IEP in aad diideysay meelaynta ay soo jeediyeen dugsiga degmada si ay u siiyaan FAPE ilmahaaga, oo ay ku jirto sheegida welwelkaaga iyo ujeedadaada inaad ilmahaaga ka diwaangeliso dugsi gaar loo leeyahay oo ay dawladduna kharashka bixineyso; ama (b) Ugu yaraan 10 maalmo shaqeed (oo ay ku jiraan fasax kasta oo dhaca maalinta shaqeedka) ka hor intaanad ilmahaaga ka saarin dugsiga dadweynaha, oo aadana siin ogeysiis qoraal ah dugsiga degmada oo ku saabsan macluumaadkaas;
2. Haddii, ka hor inta aadan ilmahaaga ka saarin dugsiga dawlada, dugsiga degmada ay ku siiyaan ogaysiis horay loo qoray, ujeeddadeeduna tahay inay qiimeeyaan ubadkaaga (oo ay ku jirto bayaanka ujeeddada qiimaynta taas oo habboonayd macquulna ahayd) , laakiin aadan ka yagleelin ilmaha mid diyaar u ah qiimaynta; **ama**
3. Kadib markey maxkamadu oggaato in falalkaadu ahaayeen kuwo aan macquul ahayn.

Si kastaba ha ahaatee, kharashka lacag-celinta:

1. Waa in aan loo dhimin ama aan loo diidin sabab ah ku guul dareysiga ku aadan bixinta ogaysiiska haddii: (a) Dugsigu uu kaa hor istaagay inaad bixiso ogeysiiska; (b) Aadan ogaysiis ku saabsan masuuliyadaada ah inaad bixiso ogaysiiska kor lagu sharaxay; ama (c) U hoggaansanaanta shuruudaha sare ay u badan tahay inay u horseedi karto dhaawac jireed ku imaada ilmahaaga; oo
2. Laga yaabo, iyadoo ay tahay go'aan ikhtiyaareedka maxkamadda ama sarkaalka dacwad dhegeysiga, in aan la dhimin ama laguu diidin sabab ah ku guuldareysigaaga inaad bixiso ogeysiiskii loo baahnaa haddii: (a) Aadan ahayn qof wax akhrin kara ama aanan awoodin in uu Af-Ingiriisi wax ku qoro; ama (b) U hoggaansanaanta shuruudaha sare ay u badan tahay inay u horseedi karaan dhibaato shucuureed halis ah ilmahaaga.